
# SIDDEEDDII AXADOOD





W.Q:- FAARAX
MAXAMUUD SUGULE

## TUSMO

1-warma qabto

2-SOOYAALKII NOLOSHA
3-maanigaa ah basaasad
4-kuu hibeeyey naftayda
5-arooskii saxiimadaha
6-farxadi waa naxdin

§§§§§************************************

## MAHAD NAQ

Waxaan mahad ballaaran u soo jeedinayaa dhammaan dadkii gacanta weyn iga siiyey soo bixidda buugan si toos ah iyo si dadban ba, waana:

cabdi shakuur yaasiin maxamed
cabdullaahi abuukar busuri
sahra cabdi xiesi
jaamac xasan maxamed
cabdi jaamac aadan
cabdulqaadir maxamed wacays"cali baashe"
xuseen sh.biixi

Waxaan mahad aan la iloobi karin u soo jeedinayaa Fowsiya aadan maxamed oo iigu deeqday waqtigeeda qaaliga ah .

## HOR DHAC

WUxuu buugan qoraal ahaan idiin soo ban dhigayaa waxyaabo sida qa libka ah la kulma dhallinta muslinka ah ee waxbarashada ama deegaanba uu u yahay waddan shisheeye oo aan diintooda haysan?wuxuu buugan isugu jiraa waano,digniin iyo waddaniyad, wuxuu si ba,an u taabanayaa oo tusaale uuu yahay kuwa aan xagga caqiidada ka dhisnayn ee wax xoogaaga hunguriga ah ka doorta ama dhaafsada towbaddoodii.

*****************************************************

FIIRO GAAR AH:

Waxaan aqristayaasha qiimaha leh ogeysiinayaa in bogga 66aad cutubka ka billowda magaciisa oo sax ahi uu yahay "arooskii saxiimadaha"

++WARMA QABTO++

Waa baryaaba warkiis lehe,dhacdo waliba waqtigeed lehe,habeenkaasi wuxuu ahaa habeeyn ay naftiisu tabaysay waxyaabo aad u fara badan,wuxuu ahaa habeen kasoocnaa habeenadii kalee soo maray,wuxuu ahaa habeen qaboobe ah,wuxuu ahaa habeen gudcur ah,inkastoo isagu aanu dareensanayn gudcurkiisa iyo gudcur la'aantiisa toona,wuxuu ahaa habeen ay saacadaha badankoodu kaga lumeen soo jeed.

Isaga oo qaba diiftaas iyo daalkaas faraha badan ayuu ku dhacay sariirtiisii goor ay kahadhay waagii saddex saacadood oo qudhihi,wuxuu galay hurdo si uu saddexda saacadood ee hadhay u nasto,si aanay hurdadu u latagin. Laakiin may noqon sidii uu kau tashaday markuu seexanayay; hurdo ayaana latagtay,maxaa yeelay sababo dhawr ah ayay hurdadu ula tagtay, isagoo waqti danbe seexday,iyo waqtiga oo ahaa waqti dhaxameed qofwalba isku naba-

yay sariirta iyo bustaha.

Isaga oo ku jira hurdadii ayaa waxaa soo galay guriga sanqadh uu dareemay laakiin uu moodayay bisado iyo wax ihamid - ah,qadar yar kadib wuxuu indhaha ku kala qaaday dhabankiisiii oo laba gacmood oo diirani dulsaaran yihiin.

goor madaxiisa marada laga qaadayna muu ogeyn,isaga oo aan hubsay ayuu booday sidii ruux salalay oo kale oo sariirtii kasoo dhacay? Albaabkii ayuu isku qaaday isagoo qaylinaya! laakiin wuxuu dhaafi kari waayay albaabkii,cod gabdheed ayuu ka maqlay meeshii uu kayimid,waliba waxaa yaab ku ahayd markii uu maqlay xxxxxxxx magaciisii Mahad...Mahad...maxaa waqtigan ku seexiyay;miyaadan fasal galayn xiisadii hore way ky dhaaftaye.?

Mahad caadi ayuu ku soo noqday wuxuuna fadhiistay albaabkii agtiisii,wuxuu u yeedhay gabadhii oo yidhi,"Walaal magacaa?" Waxay tidhi aniga saw maaha wax-

aa lay yidhaahdaa Ana".

Mahad:- Guriga sidaad ku soo gashay,yaase kaa furay?.

Ana :- Gurigu wuu furnaa markaan soo galay ayaanan xidhay.

Mahad:- Aad ayaad u mahadsantahay dantayda aad ii toosisay.

Ana :- Iminka xiisadaha kale masoo aadaysaa mise maanta waad iska nasanaysaa?

Mahad:- Maya waan imanayaa mar haday xiisadii hore idhaaftay kuwa danbaan kaqaybgalayaa.

Ana way baxday markuu u sheegay inuu xiisadaha danbe ka qayb galayo.

Mahad sariirtiisii ayuu ku soo noqday oo dul fariistay,isla markiiba wuxuu bilaabay falan qaynta adduunyada. Wuu kacay oo damcay inuu laba ilaa saddex jeer indhaha mariyo buugaagtiisii waxbarashada,laakiin wuxuu gacanta lahelay buug xuduus qor ah; wuu kala bixiyay wuxuuna indhaha qac ku-

siiyay uguna horeeyay wax uu indhaha ku dhufto magaca(qaybdiid) waxaa ku hoos qxxxx qoraa awlaadii uu dhalay magacyadoodii iyo tiradoodii,waxayna u qaybsanaayeen laba qaybood,qaybta koowaad wax uu garto kuma arag laakiin qaybtii labaad ayuu wuxuu ku arkay magaca (Cawaale) oo kaligii ah.

Xusuus dheer ayuu galay oo magacaasi ku dhaliyay,wuxuu sawirtay noloshii shan ilaa lix jirkiisii markii uu cadan joogay halkaas ayuuna kabilaabay maalin riyood waxaa marra ka go'i wayday maskaxdiisa malcaamad quraantii uu dhigan jiray iyo maalintii uu gacanta hayay Cawaale, wuxuu xasuustay maalmo iid ah oo uu gacanta haystay isagoo daadahaynaya,wuxuu xasuustay oo dhawr jeer maskaxdu ku soo noq noqonaysay ka guuridii Cadan iyo markabkii dhawrka maalmood lasii soday, wuxuu dib u noqosho ku sameeyay dagidii

Iglàn iyo sidii loogu soo dhaweeyay iyo sidii wanaagsanayd ee ay u daggeen.

Waxaa mar mar kaqoslinayay sidii wanaagsanayd ee Canbaro oo ahayd ina dhaydoon ay ugu sheekayn jirtay iyo sidii wanaagsanayd ee ay had iyo jeer ugu dadaali jirtay inuu noqdo midka carruurta ugu-xaragada badan. Wuxuu dareemay dib ugu noqosho taariikh nololeedkiisii kadib Canbaro inay ahayd mida suuro gal ka dhigtay noloshiisa maanta, haday xuntahay iyo haday fiicantahayba in kastoo wax walba idanka ilaahay ku yimaadaan.

Wareega cajlada maskaxda waxaa soo galay habeenkii naxdinta lahaa ee maxkamadii Cawaale iyo xabsigii dheeraa ee lagu riday, wuxuu milicsaday kasoo bixidii Cawaale ee xabsiga iyo noloshii wacnayd ee ay galeen, waxaase iyana xusid mudan u quudhiwaaggii ay u quudhi waayeen qaar aan ilaah iyo aadmi toona aqoon ay nolo-shoodii arbushaada ku abuureen, wuxuu si-

naxdin leh maskaxda uga ~~qa~~ dhawaaqay dilkii foosha xumaa ee Cawaale ay dileen nimankii budh cadda ahaa ~~kk~~ iyo habeenkii uur kutaalada lahaa ee noloshiisa ugu xumaa.

Mahad markii uu muddo ku jiray xusuus maalin riyood ah ayuu soo booday sidii waxhurdo kasoo kacay oo kale; buugii xusuus qorka ahaa ayuu tuuray markaasuu yidhi: "Maxaa igasoo horsaaray" Waayo isaga ayaa xusuutaas dib ugu celiyay. Jaamacaddii maalintaas wuu ka baaqday wuxuuna sameeyay xamdi naq uu ilaahay u xamdi naqayo wuxuuna tukaday laba rakco oo sune ah.

Ana waxay tagatay oo uga sii horaysay Jaamacaddii waxayna fadhiisatay baar u dhawaa si ay Mahad ula kulanto oo dhibaatadii Iglan keentay ugu sheegato.

Meeshii waxaa ugu yimid saaxiibteed Nasriin waxayna wada fadhiisteen baar u dhawaa jaamacadda si ay isugu sheegtaan wixii jira.

Nasriin waxay ahayd gabadh reer masar ah oo jaamacada meeshaa ka dhiganaysay, aad iyo aadna ay isugu dheeraayeen Ana noloshana qaybsan jireen, Nasriin waxay ka dhalatay qoys aad u ladan waana ta u suuro galisay ianay wadan shisheeye waxbarasho u soo doonato; Nasriin waxay waraysi layeelatay Ana oo ay moddo kala maqnaayeen waxayna waydiisay sababaha ay Iglan ugu soo noqotay maadaama ay ka guureen oo ay noqotay reer Holand.

Ana "Saaxiib saw adiga i og inaan kala badhnahay oo naftaydii waaxi halkan joogto".

Nasriin: "Oo waa maxay waaxda halkan k kaa joogta?".

Ana "Maxaad isga dhigaysaa mid aan xogtayda lasocon, saw Mahad halkan majoogo kamana samri kari waayin, saw saaxiib cuntadii

iima dhadhami waayin,saw saaxiib jidhkaygi ii Olol kama bixi waayin,saw saaxiib hurdadii igama yaraan oo maan gam'i waayin, saw saaxiib la'aantii naftaiiba qiimo iima yeelan waayin,saw saaxiib isagiina iguma noqon dhagax dixeed,saw maan waayin cid w wax igala qabata dhibaatada ihaysata".

Nasriin"Saaxiib anigu sidaa maan moodayn imana aad dareensiin inuu ilaa xadkaa kaa gaadhay jacaylku,ee waxaan moodayay m mar kadaad Iglan katagtay inaad ilowday sababtoo ah markii hore ee aynu isku dugsiga ahayn ee aad wadanka nala joogtay jacaylku sidaa kuuma saamayn ee ma dib baad ka jeclaatay wiilka ?".

Ana"Saaxiib wiilkan si fudud ayaan ku jeclaaday markii horena sidaan isku baranay may ahayn si caadi ah ee waxay ahayd e si dadban jacaylka igama ahayn laakiin markaan habayn lakulmay ee aanu sheekaysanay ayaa laygu dhibcay,waxayna ahayd barigaynu dhiganaynay dugsiga sare ee arintaa wax m

maygala qabanaysaa"?.

Nasriin:"Saaxiib sababaha uu kugu diidayo maxaa kamid ah mise wuu iska kaa - nacsan yahy?."

Ana "Saaxiib sababuhuu igu diiday waxaa kamid ah habeenkii iigu horaysay oo ahaa habeenkii kaliya ee aan lakulmay sasidaan horeba kuugu sheegay waxaan ku soo galay hab basaasnimo rag baana igu yidhi soo basaas,oo waxa lagu sheegaya inuu isticmaalo daroogada iyo mukhaadaraadkaba, kadibna markii aan ku guulaystay lakulankiisa habeenkaa badankiisiina aanu wada sheekeesananay wuxuu iiga waramay noloshiisa wuxuuna ogaa inaan isaga basaasayo, waxyaabihii aan kadoonayayna kumuu sifoobin kadib inanka hor fadhigiisiiba waan iska jeclaaday,isla goobtii ayaan ugu sheegay sirtii aan u daba socday mudada dheer waxaanan u soo ban dhigay inaan yeelano wada socod iyo saaxiibtinimo,wuuse igu g gacan saydhay iska oo leh"ku aamini maayo

waligay maadaams aad ahayd mid naftayda e dhibaato kdoonaysay midda kale dhiiranid... sidaad afkaaga u soo marisay waan ku jeclahay miyaadan ogayn falalalkii kuu horeeyay markaa saaxiib arintaa wax maka qaban kartaa waxaasuu igu sameeyaye.

Nasriin"saaxiib ha wal walin anigu intaan kuu qaban karo wa... ka hagran maayee maadaama arinta dh... ku baday adiguu aad sabab u ahayd ee waa inoo caawa iyo h hal... ayno joogno iyo todobada iyo badhka fiid...imo."

Mahad dodobaadkiiba laba jeer ay... c...ado u noqotay inuu tago saldhigga boolis-ka iyo xarumaha danbi baarista,inay wax ...rajo ah oo cusub ahyaan iyo inay heleen ...nimanki... budhcada ahaa ee iyagu sabab ka dhigay idanka ilaahay ka sakow kali socodnimada uu ku sugan yahay.

Mahad:waxaa laba daraadle wal wal ku -hayayhooyadii oo siday u tagtay wax war e iyo wacaal ah ka helin,dhibaatadana way ka-

danbaysay tagideedii waxaa waliba murugo aan kala go'lahayn ku haysay iyada oo ahayd xaamilo soo sad dhawaysay.

Mahad waxba may ahaateen kuu yidhi haday gaadhay reerihii ... iyo soomaaliya ee wuxuu ka wal walsanaa dhibaatada kadanbaysay iyo war qab la'aanteeda.

Mahad galabtaas wax war ah kama soo helin meeshuu aaday war ka helid la'aantuna ma ahayn mid ku cusub ee markuu tagoba wuu ku hungoobi jiray, mar mara wuxuu is ... odhan jiray Cawaale mar hadduu dhintay oo sad geeridiisii ogayd maad iska dhaafto id raadintan iyo daba socodkan oo adigu ... aada ka tashatid.

Mahad muu lahayn wax asxaab ah oo ay wada ... ood ... iil iyo gabadh kuu ... ha ahaadee, waxaa maskaxdiisa ku soo ... gab... ... ada ka kicisay ... sida ... ... n wuxuu layaabanaa siday ku soo gashay guriga iyo cidda soo tilmaantay Mahad dib ayuu u rogay dhawr

bayj oo qaybta xusuusta kamid ah bal inay ku jirto gabadhani iyo meesha uu maalin qudh ah ku arkay,sababtoo ah waxay ahayd gabadh ilaa xad itaqaan:ayuu yidhi' Maadaama ay guriga sitaos ah u taqaan oo waliba ay imagacawday:

Markii uu muddo ku maqnaa raad raaca sooyaalkii uu kasoo gudbay oo uu u xusay maalin maalin,wiik wiik,bil bil,sanad s sanad waxaa kasoo dhex baxday gabadh uu habeen kakulmay dugsigiisii sare badhtamihiisii taasoo uu aakhirkii ku maqlay inay Iglan isaga tagtay.

Waxaa kale oo uu soo xasuustay waraaq kale oo ay gabadhi holand uga soo dirtay laakiin iyadu u sheegtay inay jeceshahay ayna taqaan laakiin isagu aanu fahmin Mahad;wuxuu ku soo noqday gurigiisii waxyaabahaasna intuu wadad soo socday ayuu iswaydiinayay,gabadhii iyada ahaydna meel uu u dhaqaajiyo garan waa,inay noqoto tii waraaqda Holand uga soo dirtay iyo -

inay noqoto tii barigii hore oo soo lab
kaclaysay wuxuuna bilaabay wax akhris.

Ana iyo Nasriin waxay isugu yimaadee
meeshii ay ku balameen, socod ayay bilaa
en iyagoo u soo socda gurigii mahad, wax
so is waydiinayeen wax yaabaha ay kala
lmi doonaan mardaama ay labaduba yaqaan
aanuna ahayn nin siyaaba fudud lagu loo
karo oo fikrado kale laga dhaadhicin ka
Ana iyadu waxay Nasriin u sheegtay inay
dooda furto laakiin nasriin way ku diid
waxayna tidhi marka hore adigu lahayala
iska dhaadhici, anna aan noqdo mid idin
ex dhexaadinaysa waayo hadaad dooda fu
wuxuu u arkayaa inaan kuu soo ergooday,
owna inaad mudo kala maqnaydeen oo isak
wax iska badali karaan uuna kuu soo dab
karo.

Ana iyo Nasriin waxay soo qaateen ta
iyagoo go'aan ku gaadhay inay ana dhiba
ada si Degan ugu bandhigto Mahad.

Gurigii ayay yimaadeen, way garaaceen

laakiin muddo lagama furin goor danbe ayuu Mahad albaabkii furay markii uu dhamaysatay salaad uu tukayanay, siwanaagsan ayuu u gacan qaaday wuxuuna aad u garanayay Nasriin laakiin ana wajigeeda ayaa kuyiil si wanaagsanna uma aqoon goobta ay fadhiyeen waa qolka fadhiga Mahadna wuxuu u soo diyaarinayay sharaab iyo waxay cabaan waxaana lasoo wada fadhiistay fadhigii.

Mahad "Ii warama caawa wax dhibaato ah miyaa jira ".

Nasriin: "Waayo Mahadoow maxaad sidaa u leedahay"?.

Mahad : "Waxaan sidaa u leeyahay booqashadiina ayaa igu cusub".

Nasriin ; "Way jirtaa inaanaan ku soo booqan jirin laakiin booqashadu mar uun bay bilaabataa anana caawa waa noo bulow hadaadan hore kuu soo booqanjirin".

Mahad : Ugabadhana maad iskaaya bartid kolee wajigeedu wuu igu yaalaaye".

Ana ayaa hadalkii qaadatay oo tidhi:"saw-
nigii subaxdii dhawayd guriga kuugu imid
ee hurdada kaa kiciyay ma sidaas baad u
ilowshiinyo dhawdahay"?.

Mahad :"Waqtigaasi waxuu ahaa waqti aan
hurdo katoosay waliba aad baan k
kaaga naxay falkaad igu samaysay."

Ana : "Mahadoow su'aal baan ku waydiin-
ayaa ma jirtaa wax gabadh ah oo
aad habayaraatee xidhiidh lalee-
dahay?Mase jirtaa cid kuu soo b
ban dhigtay arimo wada socod oo
aad ku diiday? mase jirtaa wax
waqaaqo ah oo aad kaheshay gab-
dho wadankan dibada ka ah,kuwaas
oo xanbaarsanaa arimo jacayl?."

Mahad : "Marka hore anigu maba aan garan
waxaad ii waydiinayso su'aalaha-
as fara badan waayo ismaba naqa-
ane bal horta isukaysheeg su'aa-
luhu hayhoo danbeeyeene.

Ana : ."Mara ma iswaydiisay sababtii aan

laakiin muddo lagama furin goor danbe ayuu Mahad albaabkii furay markii uu dhamaysatay salaad uu tukayanay, siwanaagsan ayuu u gacan qaaday wuxuuna aad u garanayay Nasriin laakiin ana wajigaada ayaa kuyiil si wanaagsanna uma aqoon goobta ay fadhiyeen waa qolka fadhiga Mahadna wuxuu u soo diyaarinayay sharaab iyo waxay cabaan waxaana lasoo wada fadhiistay fadhigii.

Mahad "Ii warama caawa wax dhibaato ah miyaa jira ".

Nasriin: "Waayo Mahadoow maxaad sidaa u - leedahay"?.

Mahad : "Waxaan sidaa u leeyahay booqashadiina ayaa igu cusub".

Nasriin ; "Way jirtaa inaanaan ku soo booqan jirin laakiin booqashadu mar uun bay bilaabataa anana caawa waa noo bulow hadaadan horé kuu soo booqanjirin".

Mahad : Ugabadhana maad iskaaya bartid kolee wajigeedu wuu igu yaalaaye".

Ana ayaa hadalkii qaadatay oo tidhi:"sawnigii subaxdii dhawayd guriga kuugu imid ee. hurdada kaa kiciyay ma sidaas baad u ilowshiinyo dhawdahay"?.

Mahad :"Waqtigaasi wuxuu ahaa waqti aan hurdo katoosay waliba aad baan k kaaga naxay falkaad igu samaysay."

Ana : "Mahadoow su'aal baan ku waydiinayaa ma jirtaa wax gabadh ah oo aad habayaraatee xidhiidh laleedahay?mase jirtaa cid kuu soo b ban dhigtay arimo wada socod oo aad ku diiday? mase jirtaa wax waqaaqo ah oo aad kaheshay gabdho wadankan dibada ka ah,kuwaas oo xanbaarsanaa arimo jacayl?."

Mahad : "Marka hore anigu maba aan garan waxaad ii waydiinayso su'aalahaas fara badan waayo ismaba naqaane bal horta isukaysheeg su'aaluhu hayhoo danbeeyeene.

Ana : ."Mara ma iswaydiisay sababtii aan

subixii dhawayd guriga kuugu ima

Maha : "Isweydiiyay oo anigu in

aanan moodayn ee waxaan

ayay gabdh jin."

Nasriin: "hadaba Mahadow anigu a

sheego gabdhan isku is

ahaan jiray dugsigeehi

gaceedana waxaa layira

ba anigu ma qarinkaree

wareegtay wadanka Hola

kaaga timid oo kuu soo

yeelatay waraaq horena

soo dirtay waxa intaa

yayna waa jacayl ay ad

qabto, ee aday ku jirta

wax uga qaban lahayd.

Mahad: "Haa..Haa ..iminkaan ga

gabadhii basaasada aha

gaa u shaqayn jirtay",i

Ana lahadlaya wuxuu yi

gayso Ana anigu miyaana

kuu qancin, ma Yurub baa

yday mid ku jeclaada adna aad jeceshahay, maxaa ikaa daba dhigay sbanta sano?

Ana aad iyo aad ayay u madaabaatay markay dhagaysanaysay hadaladiisa waxaana isku soo taagatay ilmo waxayna ku dhawaatay inay suuxdo hadalada naxariis darada ah ee Mahad kasoo yeedhaya dartood, waxay tidhi "Mahadow u malaynmaayo qof kaa bini aadminimo xuni inuu jiro, waxaase ayaan darro h haysataa midda ku jeclaata oo ah midda iga keentay Holand ee ikeentay Iglan, waa su'aale miyaanay hooyo ku dhalin ama gabadhi kula dhalan? Naxariista dumatku xagay kaa martay?."

Mahad :"Horta mid haygula yaabin gabadhyahaytaasoo ah jacaylka aad sheegayso sababtoo ah anigu wax ma jeclaan dhibka aad dareemaysana aniga culayskiisu ima saara, midda kale aad leedahay naxariista dumarku xagay kaamartay, dumarka uma naxariis xumi kuwa dadkayga ah ee waxaan diidanahay dulsocodkaagaas oo kale, hadaadse ogtahay .

colaada aan u qabo reer Yurub oo dhan ima aad daba socoteen. Nasriin kalmadaha danbe ee Mahad afkiisa kasoo baxayay ayay kaga qanacday waxayna ogaatay inuu mahad gabadhan meel fog ka colaadinayo ayna ku kalifeen dhibaatooyin loo gaystay isaga ama q qoyskiisa.

Nasriin waxay Ana ku tidhi "Mahad jacaylkaaga uma jeedo arintuna waa mid intaa ka qoto dheer ee jacaylkaaga jahaduu u socdo wax kabadal,inkastoo jacaylka dawadiisu ay tahay isagoo hela kii ku beeray, Ana "ama reer Yurub haku xumeeyaan aha yaanay ku xumaynin ee ogow inaanan sidaa kaaga hadhaynin ee aan samaynayo falka kasta oo ii suuro galinaya lanoolaan shahaaga. Nasriin "Saaxiib waxaan u malaynayaa inaad tahay war maqabto ee horta wax hubso." Sidaas ayayna ku baxeen iyagoon wax guul ah ka gaadhin arintii ay u yimaadeen meesha hadaba waxaa is waydiin leh oo in dib loo jaleeco u baahan colaada uu Mahad u qaday

reer Yurub oo dhan,iyo sababaha keenay waxay ila tahay inaynu dib u milicsano taariikh noloeedkii Mahad ama qoyskoodii oo dhan,taas ayaana inoo suuro gal-inaysa hekitaanka colaada qotada dheer ł leh.

## ****SOOYAALKA NOLOSHA*****

Mahad awawgii oo ahaa kii aabihii dhalay waxaa la odhan jiray Qaybdiid, wuxuuna a ahaa reer miyi xoolo dhaqato ah, dagaankoodu wuxuu ahaa dhulka loo yaqaano Nuxwa (Nugaal) oo ka tirsan gobolka waqooyi ə bari ee Ingiriisku gumaysan jiray.

Qaybdiid wuxuu lahaa laba xaas iyo xoolo aad u fara badan; oo isgu jira Geel, Lo' Adhi iyo Fardo.

Hadaba nin wayni wadkiisa wuu yaqaanaaye qaybdiid waxaa qabtay xanuun, wuxuuna isgu yeedhay labadiisii bahood, iyo caruurtii uu dhalay si uu ula dardaarmo.

Qaybdiid labadiisa bahood mida yari wax carmur ah waxay lahayd wiil qudh ah oo la odhan jiray Cawaale, bahda kalana waxay lahayd shan wiil iyo saddex gabdhood. Hadaba Qaybdiid wuxuu caruurtiisa kala dardaarmay siday xoolaha u qaybsan lahaayeen; iyo qolo walba waxay qayb u helayso, waayo wuxuu ahaa shiikh aad u ya-

qaana shareecada,markii uu u qaybiyayna waxaa goob joog ka ahaa rag badan oo ehelada reer qaybdiid ka mid ah,ugu danbayntii wuxuu kala dardaarmay in bahda yar iyo wiilka ay haysato la dhaqaaleeyo,maadaama wiilka yari yahay rabi wax xadgudub ahna aan lagu samayn.

Qaybdiid mudo kadib siday qiyaastii-su ahayd wuu xijaabtay,taladii reerahana waxaa lawareegay Maxamed(feejig)oo ahaa curadkii Qaybdiid.

Markuu odaygu dhintay k... shir ayay yeesheen ilmo Qaybdiid ... go'aan ku gaadh... lakala qaybin ee ay sidooda isugu jiraan,iyaga oo aaminsanaa caado soomaali odhanaysa xoolaha haddii lakala qaybiyo inay madhanayaa ama aanay sidoodii ahaanayn.hadaba sida geel jiraha u caadada ah waxay geela raaciyaan oo geean yare ka dhigtaan wiilasha kurayada ah,iyaga oo inta badana ku rara qalabka geela loo adeegsado oo ay kamid=

yihiin Hadhuubka,ama gorofka geela lagu maalo,Gudinta geela lagu oodo;koorahana loo gu qoro,sibraarka oo ah midka caanaha lagu qaato,wuxuuna kasamaysan yahay maqaar, wadaanta xoolaha lagu waraabiyo,iyo qalab kaleba.

Hadaba Cawaale oo ahaa kii bah gooniga ahaa ayay walaaladii geelii daba dhigeen. Cawaale hooyadii waxaa la odhan jiray(Cosob) aabaheedna dhaydoon,Cosob markii wiilkii kali ahaa geelii laga raaciyay waxay wayday wax maalin qudha Adhigii ka nasiya ama hawlo dhawr ah oo kale u qabta waxayna wiilkii reerka ugu waynaa ka codsatay inuu wiilka geela uga soo reebo,si uu u caawiyo,laakiin Maxamed aayadii dhag jalaq uma aanu siin,muddo markii ay ku jirtay silicaas ayuu maalintii danbe Cawaale soo diray oo ku yidhi orod hooyadaa adhiga u raac-Maxamed(feejig)markuu wiilkii yaraa muddo kasoo maqnaa wuxuu bilaabay inuu xoolihii maalinba awr iibsado

qaarna geela ku dhex qashon geela wiilasha kale kuma dhici jirin waayo?waxay ahaayeen rag waaweyn oo waxooda eegta,laakin waxaa kuwiisii cidla laga helay Cawaale.

wiilasha kale qudhoodu kama maqnayn dibindaabayada xoolaha walaalkooda yar, falkaasina wuxuu ahaa mid loo wada dhan yahay.

Hadaba Cawaale oo ahaa wiil aad u fecj-ig,markasta oo geelu reeraha u soo dhawaa-do wuxuu tirin jiray geelisii,waxaana maq-naan jiray qaar kamid ah,marka uu wayd-iiyana waxaa loogu jawaabi jiray geelal buu raacay,geela buu raacay,bahal baa cunay iyo baryahanba wuu maqnaa.

Cawaale wuxuu markasta neefka maqan la-socodsiin jiray hooyadii,ugu danbayntii cadaatay in geelan Cawaale si kale xaalki-isu yahay,sababtoo ah kuwa kalaba geeloodu ma lumo bahalna ma cuno ee maxaa ka Cawaale lumiya bahalkana u looga.?

Canbaro waxay wiilashii kacodsatay in gee-
looda loo sooco si ay iyagu u raacaan oo u dhaqaalaystaan ;maadaama wax ka dhaca moo-yee aanay waxba ku kordhayn,laakiin Cosob-waa loo diiday waana lagu xumeeyey geelii.

Xaaladu maalinba maalinta ka danbaysa way sii xumaanaysay ugu danbayntiina waxay gaadhay ergo iyo in loo tago odayaashii e dardaarankii odayga ogaa si ay u dhexgalaan oo moolaha loo siiyo.

Aakhirkii xoolihii waa lakala soocay Cawaale iyo hooyadii waxay u guureen meeshii ay deganaayeen reer dhaydoon oo ah cosob walaalkeed Cawaalana abti u ah.

Cawaale wuxuu noqday nin reer hawshii lagu aamino,da'diisuna waxay gaadhan shan iyo toban jir.

Cawaale wuxuu xoolahoodii ku darsaday geelii abtigii,wuxuuna fiid walba sheeko wadaag la lahaa ina abtidii oo la ... jiray Canbaro,oo ka tirsanayd qoyska eeda-deed si ay u caawiso oo ariga ugu raacdo.

Cawaale iyo canbaro waxay kala wayhaa-yeen saddex sano,waxaana waynaa Cawaale?

Cawaale markay da'diisu gaadhay sideed iyo toban sano ayuu galay magaalo,mudana wuu ka shaqaysan jiray,ugu danbayntii wu-xuu shaqo kahelay xeebaha waqooyi bari ee badda cas,wuxuuna raacay doon ay shirko ku ahaayeen niman soomaali iyo reer cad-meed ah.

Cawaale markay doontu ku soo xidhato xeebaha soomaaliya wuxuu iman jira reer-kooda isagoo usida dhar iyo lacagba,reer-kooduna wuxuu ahaa reeraha ugu nolosha siican waqtigaas. Cawaale tagitaankiisii hore canbaro ma ahayn Qof u bisil;haasaa-weeiyo sheeko guur,hayeeshee markii danbe ee uu Cawaale yimid wuxuu arkay inay gaa-murtay oo garaadkii iyo garashadiiba ka -kortay,wuxuuna is tusay inay waqtigeedii joogto.Markii uu u soo ban dhigay qorshi-hii guur iyada ayaaba ka darayd oo si fu-dud go'aankiisa ugu raacday.

Waalidiintii waxay ogaadeen in ~~axax~~ awla-adoodu is doonayaan,ugu danbayntiina Caw-aale iyo Canbaro waa layaiu dhisay,aqalk-oodiina waxaa lataagay maalin axad ah.

Cawaale wuxuu ku noqday doontii iyo shaqadiisii,nasiib darose doontii markay safarkeedii bilowday ayay ku jabtay xee-bagha Cadmeed.Cawaale wuu iskaga yimid wa-xuuna soo raacay markab ku socday soomaa-liay.intuu saaraa ayaa wuxuu shaqo waydi-istay kabtankii markabka,waana loo ogola-aday,Cawaale midadii uu markabku ber bera ku xidhnaa wuxuu soo gaadhay reerkoodii iyo ki sii cusbaa ee uu unkay,wuxuuna u sheegay inuu markab shaqo kahelay,oo uu yaraan doono is aragga iyo iska warqabko-oduba.

muddo tobon casho ah kadib wuxuu aad ay Ber bera iyo markabkii uu ka shaqayna-yay.markabkaas oo laga lahaa wadanka ingi-riiska wuxuu ka shaqayn jiray qaaradda Yu-rub iyo Bariga fog,Cawaalena uma suuro g

galin saddex sanadood inuu reerkiisii ka-watdoono,Mudadii uu maqnaa waxaa hooyad-ii Canbaro dumaalay adeerkii Jaamac oo markii hore aan joogin,soo noqodkiisiina wuxuu ku soo talagalay inuu reerkiisii u raro Igland oo uu dagiyo London,wali-ba xaafado dhawr ah oo soomaali dagan ‡ tahay si ay Canbaro u caawiyaan maadaama ay qariib tahay,isagana dhoofkiisu badan yahay,waana uu fuliyay ku talo galkiisii; wuxuuna helay dhalasho iyo sharci sugan.

Dhawr bilood markuu cawaale xaaskii-sii ka maqnaa ayuu soo noqday,wuxuuna u yimid iyado xaamilo ah.Niyad ahaan wu-xuu aad u jeclaa inay ubadkiisu wadan m muslin ah ugu dhashaan ,si uu diinta iyo dhaqanka islaamka ugu barbaariyo,wuxuuna doortay inay Canbaro ku dhasho Cadan, waqtigaana soomaalida Yeman iyo wadanko-odu isugu mid buu ahaa.

Hadaba Canbaro waxay umushay habeen Axad ah,waxayna dhashay wiil,waxaana loo-

gu walqalay(Mahad).

Cawaale wuxuu isaga noqday shaqadiisii iyo markabkii uu ka shaqaynayay,halkaas ayuu dhaqaalaha uga soo diri jiray,m mar mara ugu imaan jiray.

Mahad markii ay da'diisu gaadhay sideed sano ee uu Quraankii si fiican u bartay ayuu Cawaale reerkii u soo rara Iglan iyo meeshii ay markii hore deganaayeen,si uu wiilkiisa iskool ugu daro;meela ugu w wada noolaadaan,maadaama uu isagu joogo wadanka markabka laga leeyahay,imaanshihiisuna u badan yahay wadankaa.

Mahad waxaa lagu daray iskool halkaa ayuu reerkuna muddo nabad qab ku deganaa, hadaba waxaa jirtay habeen Axad ah iyagoo gurigooda iskaga cawaynaya ayaa waxaa reer Cawaale soo weeraray niman tuugo ah oo doonayay inay dhacaan xoolihiisa iyaga oo lacag ku tuhunsanaa,Cawaale isaga oo is difaacaya ayuu dilay nimankii mid kamid ah,dabadeedna Cawaale waxaa lagu soo eedeeyay danbi ah ninkii uu dilay,waxaana

lagu xukumay lix sanadood oo xadhig ah,Mahadna waqtigaas wuxuu dhiganayay fasalka sideedaad ee dugsiga dhexe,.

Muddo kadib Cawaale xabsigii wuu ka a dhamaaday shaqadii markabkana waa loo diiday,waxaana lagu soo eedeeyay inuu yahay nin dilaa ah,sababtoo ah waraaqihiisa danbi la(aanta waxaa ugu qoran falkii uu sameeyay iyo inuu muddo xabsi ku jiray,

Cawaale waxoogaa xaq ah oo uu kahelay markabkii uu kashaqayn jiray ayuu wuxuu ku furtay maqaayad,waxayna u yeelatay suuq aad u wanaagsan,waqtiyada aanu shaqo lahayn wuxuu diinta Islaamka ku wacdin jiray dad daba badan oo soomaali ah oo magaalada a deganaa.

Niman ay Cawaale maqaayadiisa isu dhawaayeen oo iyana meesha maqaaxi uga furayd nimankaasi waxau kula coloobeen faafinta diinta waxayna mar marsiinyo ka dhigan jireen inuu maqaayadooda suuqii ku xumeeyay waxayna u qaadeen colaad aad u xoog badan

si ay meesha dhaqaaluhu kasoo galayo u baabi'iyaan,falal aadami nimada ka baxsana way kula kici jireen;laakiin sidaas w waxba ugama suuro galin.

Cawaale baryahaas ayuu Canbaro markab soo saaray oo uu u soo diray soomaaliya iyada oo uur leh,wuxuuna u soo dhiibay lacag uu ugu talo galay inay guri ku dhisto iyo lacag uu ugu siidhiibay reerihii,Cawaale iyo Mahad oo jaamacad dhigta ayaana ku soo hadhay Igland.

Nimankii Cawaale cadaawadiisa u badheedhay waxay go'aan ku gaadheen inay dilaan waxayna goor habeen ah ku direen Ey ay lahaayeen;laakiin waxaa goobtaas ku dhintay Eygoodii oo uu Cawaale tooray kukala jaray,sidaas kuma ay hadhin nimankii ee waxay qaban qaabiyeen sidii ninkaas ay qudha uga jari lahaayeen,waxay isku darsadeen lacag waxayna siiyeen niman Budhcad ah oo u dhashay Talyaani,habeen Axad ah ayaa Cawaale gurigiisii koogu yimid iyag-

oo wata laba baabuur,kadib waa loo yeedhay markuu soo baxay ayuu saddex xabadood la-abta iyo madaxa lagaga dhuftay,nimankiina sidaas ayay ku carareen.

Cawaale isagoo naf yari ku jirto ayuu dardaaran bilaabay iyadoo Mahad ku dul oo-yayo wuxuuna yidhi;"Aabe lagacta bangiga taala qaado jaamacaddana dhigo,diintaada xaqa ahna waligaa hasiidayn,hana odhanin meel aan hooyo iyo aabe joogin ma joogi kartide iskaga carar,mida kale markaad waxbarato ogow waxaan wax kuu barayay waxay ahaayeen dalkaaga,dadkaaga iyo Diin-taada inaad anfacdee,mida kale kabadhka guriga yaala waxaa ku jira buug xusuus qor ah oo ay ku jiraan aha ku qoran yihiin taariikhda reerkiina oo dhan,dabadeed na-ftii amaahda ahayd Cawaale waydaysay.

Hadaba sababahaas dhawrka ah ayuu Mahad kula coloobay dadka loogu yeedho reer Yurub.

Bal iminkana aynu dib ugu noqono taariikh nololeedkii Ana.

Ana waxay ku dhalatay caasimada wadanka Holand ee Amistardam,aabeheed wuxuu ahaa ganacsade kaganacsada macdanaha kaladuwan,wuxuuna ka bilaabay heer aad u hooseeya.

Ana aabaheed yáraantiisii waxuu ku barbaaray caasimada wadanka Ingiriiska ee london halkaas oo uu joogay ama daganaa muddo labaatan sanadood ah,waxaana magaciisa la odhan jiray Devid,hooyadiina waxay ahayd Ingiriisad• David wuxuu guursaday gabadh ay isku arday ahaan jireen oo la odhan jiray maary,guurkoodana wuxuu u soo maray dhibaato fara badan,sababtoo ah mary waxaa jeclaa wiil iyaduse may jeclayn ee waxay jeclayd Devid oo isna jeclaa dhawr jeer ayaana devid dhaawacyo kasoo gaadheen wiilkii jeclaa,laakiin aakhirataankii markuu u adkaysan waayay dhibkaas wuxuu ula cararay wadankiisii hooyo,

iskuulkiina barigaas ayaa ugu danbaysay.

Devid barigaas ayauuna ganacsiga bilaabay,aakhirkiina wuxuu ka gaadhay guul,wuxuuna noqday dadka ugu milyooneersan wadankaa. Hadaba Devid waxaa u dhashay wiil iyo gabadh;aakhirkiise wiilkii isagoo dugsiga dhexe dhigta ayuu gaadhi jiidhay oo goobtii ku geeroyooday,waxaana caruur u noqaday Ana oo qudha,wuxuu arkana iyada ayuu ugu jeclaa, codsigeedana wuu yeeli jiray;inta badan wuu ilaalin jiray gabadhiisa.

Hadaba Ana aabaheed iyo hooyadeed way kala tageen iyada oo lix jir ah waxaana kaxaysatay hooyadeed,oo Iglan ku soo noqotay Anana halkaas ayay hooyadeed iskuu kagesay.

Akhirataankii markii ay dugsiga sare e soo gashay ayuu aabadheed dhintay,dabadeed waxay soo aada y Holand iyo wadankii ay ku dhalatay,si ay xoolihii aabaheed ka dhintay a dhaxasho,sidaas ayayna noqotay,waxaase ka aqnaa oo ay tabaysay wiil qudha oo ay nolsha laqaybsato,wahel la'aani way haysay,

marhadaanay wehel haysana dumarka waree
kama maqna,hadaba waxaa jiray wiil ay j
clayd,bal hadaba aynu dib u milicsano
sheekadeedii.

## ** MAANIGAA AH BASAASAD?! **

^^^^^^^^^^^^^^^^^^^^^^^

Mahad wuxuu ahaa wiil maatiin ah oo dheer aad iyo aadna u dabeecad wanaagsa hadaba waxaa jirtay inuu dhigan jiray d gsida sare wuxuuna ahaa wiil kali socod ah oo aan qof bini aadam ah raacin,waxa na ku kalifay sababo dhawr ah waa mide aabihii wuu xidhnaa,mida labaad galinka danbe wuxuu ka shaqayn jiray makhaayad si uu reerka waxoogaa dhaqaale ah ugu so kordhigo waayo muu ogayn aabihii wuxuu mudan doono ama ku danbayndoono,markaa waa inuu kasiib gaashaantaa,dhibaatooyink soo foodyeelan doona,haddii aabihii nolo shiisu xabsiga ku bas noqoto.

Hadaba waxaa jirtay in mahad ardaydi

la coloobeen isagoo ahaa midka markasta ugu buundada dareeya iskuulka oo dhan sidaa darteed ardadu waxay kasameeyeen daçaayado fara badan iyaga oo leh "waa daroogiiste;hadaanu ahayn muxuu ardayda qof qudha uga raaciwaayay,xataa marka uu fasamka fadhiyo ma hadli jirin wuxuuna e ogaa inaanu hadalka badani faa iido lahayn. Ardaydii ay Mahad isku fasalaka ahaayeen waxay baadi doon u galeen sidii ay mahad xogtiisa u heli lahaateen,kumase guulaysan ogaanshsha arimihiisa gaarka ah,ugu danbayntii waxay qalqaaliyeen bal inay ku tijaabiyaan xagga gabdhaha waxaana loo xulay Ana oo ay iskuulka wada dhigan jireen;

Gabadhii waxy dex geed dheer iyo geed gaabanba u fuushay siday Mahad arimihiisa wax uga ogaan lahayd,waxayna ugu talagashay qarash ay ku soo jiidato oo ay ka danbeeyeen ragii soo dirsaday,Mahad iyo jeer waxay isku dayi jirtay siday ula kaftami lahayd,laakiin wuxuu ahaa hid aan ...

dheg u dhigin hadalada dhago haladka ah ee had iyo jeer afkeeda kasoo yeedhaya.

Ana muddo ayay daba socotay oo kadaba hadhi wayday waxayna isku dayday siday habeen qudha ula kulmi lahayd si ay hawsheeda uga fushato,laakiin u muujinaysay inay jeceshahay,Mahadna wuu ogaa laakiin markay kadayn wayday ila balan habeen qudha ayuu balamiyay si uu u qanciyo wuxuuna ku balamiyay baar uu isagu u caynumay isagooo diidanaa inuu afkaarteeda raaco,habeenkaasna shaqadiisii iyada ayuu u iloobay.

Waqtigii balantu ahayd ayaa waxaa laysugu yimid goobtii kulanku ahaa waxuuna ahaa baar tumasho oo khamira iyo waxyaabo kale oo fara badanba lagu sameeyo laakiin mahad wuu isku kalsoonaa,
Laba kursi oo isku soo jeeda ayaa la fadhiistay markaagay Ana tidhi "u yeedho sharaab noocaad rabto,wuxuu yidhi"sharaabka anaa inoo shubayee lagaagtaada hayso

markaasuu uyeedhay dhalo caana ah,iyana waxay u yeedhatay laba geeg oo khamri ah Mahad wuxuu gabadhii u sheegay inaanu lasii fadhiyi doonin marhadaad khamri cabayso,ee danahaaga deg deg u sheego waqti qaali ah ayaan kuu soo lumiyee."

Ana "waxaad tahay wiil dhalin yaro ah oo waliba aan isku kalaas nahay,hadaba mudaan ku doondoonayay,dookhayga ayaa ku doortay,dareenkayga ayaa ku raacay,damiirkayga ayaa cid kale diiday,dookhuna waa waa wax jiree dibin daabyada daa.

Mahad "Marka hore i dhagayso gabadhyahay hadaad i jeceshahay oo ay dhab kaatahay kula yaabi maayo,jacaylkuna waa wax jira laakiin waxaa jira sababo dhawr ah oo aanan kuula wadi karin jacaylkaaga waa mida horee waxaynu nahay kala diin,diintayduna ii banayn mayso inaan kula socdo,midda labaad aniga aabahay wuu xidhan yahay caruurna anaa u ah ilaa saddex sanadoodna wuu xidhnaa,saddexna way u hadhay haday

ilaahtiisa noqoto,waxaanan u dhexeeyaa oo waqtigaygu u qaybsan yahay iskuulka,iyo shaqo aan galabtii ka shaqeeyo,xabsiga,iyo habeenkii oo aan wax akhristo."

Ana "Runtii aad iyo aad ayay u la dhacday sida uu u hadlayo iyo hadalada runta u dhaw waxayna layaabtay go'aan adkaantiisa waxayna ogaatay inuu yahay dantii yaqaan,wixii lagu sheegi jirayna ay ahaayeen been,uuna yahay midka kaliya ee jidka nolosha akhaya waxayna u sheegtay xaqiiqdii dhabta ahayd ee ay usucotay iyo inay isaga baadhaysay oo loo soo diray laguna haal galiyay,sabab-too ah intii yarayd ee ay hor fadhiday ayay falaadhihii jacaylku laabta fadhiisteen wixii horena waxay ahaayeen been been iyo soo jiidasho.

Mahad "Aniga laftaydu waan dareen sanaa xaalada aad ii daba socoto,caawana waxaan kuu balamiyay inaad ogaato xaqiiqda dhabta ah ee aan ku suganahay,goobtiina wuu ka kacay intuu macasalaameeyay.

Gabadhu way yaabtay waxayna ka fajacday sida fudud ee uu u dhaqaaqay waxayna ku noqotay mucjiso waxay isku dayi jirtay had iyo jeer mahad siday taako taako ugula socon lahayd, way ka go'day wiil oo dhan isaga mooyee,isna gacan kumay hayn;maalin danbe ayay kula kulantay meel sikoolka agtiisa ah iyadoo ismiidaaminaysa;waqtigan danbe ee ay daba socoto kama ah basaasnimo ee jacaylkii ayaa faraha saaray.

Ana "Mahadaw ii ogolow maqalka dhegahaaga iyo qaybta xasuusta ee maskaxda inaad inyar dareenkooda iigu deeqdo,iina dulqaado dadnimadaydana qiimee,dabacsanaana halagaa helo.

Mahad " Waligay layguma xaman bini aadminimo xumo iyo qadarin la'aan ee u jeedadaada hadal adaa ku hortaaganahee.

Ana "Marka hore waxaan arko oo indhahaygu qabtaan adaan kuugu jecelahay,jacaylkuna wuxuu abuurmaa marka shaqsi uu shaqsi kale in dhaha ku dhufto oo uu jeclaado sh-

shaqsigaa kale soo hor joogsigiisa isagoo aan odhaahdiisa macal;midna waa mid ka e abuurma odhaah iyo arag wada socda taasina waa midda iminka idaadahaynaysa aniga.

Mahad "Marka hore waxaa iga su'aal ah jacaylku markuu qof qudha ku kooban yahay oo aanu kan kale laqabin maxaa lagu furdaaminkataa arintaa iyada ah.?"

Ana "Waxaa lagu furdaamin karaa qofka lajecelyahay isagoo qofkakale qiimeeya tiisana u raaca bini aadmi nimadana qadariya,dunidana inta badan lagama helo dad is jecel waana waxyar inta dookh isku raacda,waxaana aad u fara badan laba mid wax jecel yahay midka kalena aanu jeclayn taasina waa mashaakil bulsho waynta dunida kubaahsan waana tan maanta ihaysata oo kale ee adiga ayay ku jirtaa sidaad iga yecli lahayd.

Mahad "ka waran hadaad adigu [illegible]eceshahay anna aan midkale jeclahay,gabadh a

[illegible]

aan iyada ahayna aanan habeen ku seexan kuna soo toosin inaan xidhiidh layeesho. Ana "Taasi waa mashaakil labaad laakiin anigu uma arko inay dhab kaatahay,inaadse leedahay iyada iskaga riix mooyaane,nafta wax jecelina sidaas kuma samirto kumana rajo go'doilaa ay aragto wax muuqda oo quus ku beera,xitaa mar mar baanay suuro gal ahayninay sidaas ku quusato oo kaga hadho kay jeclayd ilaa ay lagod gasho sida mudo badan dhacday.

Maha Dhawr talaabo ayuu horay u soo qaaday Anina way lasoo saan qaaday,wuxuuna ugu jawaabay "uma aan soo diyaar garoobin socodkaagay iyo dood intaa le'eg, midda kale goor maad i jeclaatay,hadalkii habeenkiina ma dhab buu kaa ahaa? saw matihid tii iyadu afkeeda ka qiratay inay i basaasaysay,maxaad iska daalinaysaa waxaabad tahay gabadhiciidan ah oo dawladda u shaqaysa,mase kula tahay inaan ku aaminayo waligay? waayo

waxaad igu soo gashay waji aad u fool xun, iminkana waxaad isu rogtay mid wax jacal, sidaa darteed waligay ku aamini maayo ee waqti yuu kaa lumin intaana hay noogu ekaaton nabadeey.

Mahad socodkiisii ayuu iska sii ambaqaaday, Aanana halkeedii bay iska sii taagnayd.

Ana iyadoo aad moodo sidii qof dhaxani ku hayso meel cidla ciirsila'ah ayay waxay fadhiday jardiin meeshii mahad kagatagay, gadhka iyo labada low ayay isku haysay waxayna ku jirtay fikir dheer, iyadoon goobtii ka kicin sidiina u maan doorsan ayaa waxaa u timid gabadh ay isku fiicnaayeen oo jayidhaahdo Nasriin.

Nasriin iyada oo kayaaban balaayada maanta saaxiibteed ku habsatay ee ilaa heerka ay uga jeedo gaadhsiiyay ayay intay u soo dhawaatay wajiga qabatay oo madaxeedii kor u soo toosisay iyadoo dabacsani ula hadlaysa ayay su'aashay waxa helay;

Ana iyadoo codkeedu taag daran yahay ayay tidhi "saaxiib waxaa i haya wax aadan waxba ka qaban karin."

Naxdin iyo layaabay Nasriin gadaal ula booday. "Saaxiib maxaa dhacay!!ii sheeg h hadaanan wax kaala qaban karayn aan xalkeeda kula baadi doonee".

Nasriineey waligaa wax ma jeclaatay mase lagu jeclaaday ayay aana waydiisay."Maya; waligay wax ma jeclaan,la imana jeclaan" ayay ugu jawaabtay iyadoo sii faaxx fariisanaysa. "Hadaba saaxiib arintaydu taasay ku lug leedahay hadaanad wadyo aragnimo u lahayna wax kaqabad keedu wuu kugu adkaanayaa". "Saaxiib hadalka ii saafoo;ma adaa wax jecel mise waa lagu jecel yahay?"

"Anaa wax jecel,hadaana wax jeclayn nadhibaataas iga muuqan lahayd,sidiisaan hawl yari u dhaqaaqi lahaaye."

"oo ma meeshan buu kaaga dhaqaaqay, halkan aad joogto" "Haa saaxiib maxaan sameeyaa?" "Haatan fasaladii baa lagalaya-

aye bal ina keen aan sheekadan dib u dhiganee."

Anasiyo Nasriin halkii bay iska soo raaceen soona aadeen fasaladoodii,markii laga soo baxay xiisadihii,ardadiina soo wada baxeen ayay dhalin yaradii Ana hawsha u dirsatay ay soo wada aadeen si ay war bixin uga siiso waxyaabihii ay Mahad kala kulantay.

Afar wiil iyo laba gabdhood ayaa hasheeraha kasoo galay kii ugu madaxsanaa baa su'aalay isagoo farxada u muujinaya "Ana haye bal nooga waran ninkii isaga ahaa?" "ninkaas waxaad ku sheegayseen waxba kama jiraan,kunana sifoobin. Waa caadi" ayay ugu jawaabtay iyadoo socodkeedii sii wadata.

Habbihii mid kamid ah ayaa si jees jees ah ugu tidhi iyadoo wiil ku tiirsanaysa" hablaha sidee ku yahay adigase makugu soo dhacay waa digii lataagnaaye"? "laguuma dirsan"ayay Ana tidhi iyadoo ha-

oo hadalka gabadha ka xanaaqsan.

kii ugg madaxsanaa baa inta ka yaabay xana-
aqa Aana ku yidhi"sow anagu..sow anagu kuu-
ma dirsan in aad ninkaas soo baadho?".

Waxay tidhi"MA ANIGAA AH BASAASAD"

"sow adigii markii horeba hawshan far-
aha la galay,maxaa kugu dhacay?"mid dhalli-
ntii ka mid ahaa baa su,aalay.si cadho ku
jirto ayey ugu war celisay"ha noo joogto ha-
lkaas"wayna ka soo leexatay.

Aana markey dhallintii ka soo dhaqaaa-
qday ayey horteeda ka aragtay mahad oo gees
ka daawanaya waxa dhacayey,ha yeeshee mark-
ii ay indhahoodu isku dheceen ayuu ka dhaq-
aaqay,Aanina naxdin bay meeshii uga dhaqaa-
qi kari weyday.

Aana waxay caga jiid iyo fakar ku soo
luudaba waxay soo gashay gurigoodii,waxaase
la yaab lahayd markii misna loo sheegay ge-
eridii aabaheed oo ku geeriyooday Holand,ge-
eridaasi waxay aani ku noqotay geeri naxdin

leh,waxayna hooyadeed u sheegtay in ay ig-
an ka wareegi doonto oo ay u wareegi doon
holand si ay u doonato dhaxalkii aabaheed.

Laga bilaabo maalmahaas waxay isu di-
aarinaysay sidii ay u tegi lahayd oo ay i
qabanqaabin lahayd,muddo laba wiik ah oo
sii joogtay igland waxay ku jirtay imtixa-
nkii loogu gudbayey fasalka seddexaad ee
dugsiga sare.

Habeen ka mid ah habeenadii uu imtix-
aanku dhammaaday ayey ardaydii sameysteen
fladdii xidhitaanka dugsiga,arday walbana
habeenkaas waxuu siday kaamarado uu ardayd
sawir kaga qaato,Aana iyo mahadba waxay ka
mid ahaayeen ardayda meeshaas isugu timid,
guriga xafladda lagu qabtayna waxaa lahaa
Aana saaxiibteed Nasriin.

Haddaba wxay Aana saaxiibteed nasriin
u sheegtay in ay mahad sawir uga qaado si
ay hadhow u daawato,nasriinna waa ka yeesh-
ay,nasriin intay kaamaradii Aana ka qaaday

ayey mahad  si caadi ah sawir farxadeedkaas uga qaadatay dabadeedna ugu wareejisay Aaana.

Aana habeenkaas waxay gaadhay guul ay muddo baadi doonaysay si ay habeenkii u saawato sawirka mahad,waxayna go,aan ku gaadhay sidii ay gacan ugu dhigi lahayd in ay sameyso tab kasta oo u suurta gelineysa.

Aana markii ay xafladdii dhamaatay ee ay gurigoodii tagtay waxay qabanqaabo u gashay sidey ku tegi lahayd,laba maalmood a dibna waxay u kicitintay holand.

Markii ay tagatay holand waxay gacanta u dhigtay maaliyaddii aabahood,waxayna gahay nolol ka duwan tii hore ay ugu jirtay, aasoo ah ku shaqaynta maaliyaddii aabahood dhantay,Aana inkastoo ay maaliyad fara adan haysatay haddana waxaa marna laabteea ka go;i waayey mahad,waxayna ku seexan irtay kuna soo toosi jirtay sawirka mahad, axayna wararka kala heli jireen nasriin oo

iyadu u soo sheegtay jaamacadda uu mahad dhigtô,markey heshay bokiskiisii waxay us- oo dirtay waraaq ay ugu cabanayso uguna sh- eegtay in ay weli jeceshahay,waxayna tidhi "waxaan ahay naf ku jecel waxna aad la qa- ban wedaywaxaan hay mid sawirkaaga ku see- xata kuna soo toosta markaa waxaan kaa co- dsanayaa in aad bani,aadnimada dhowrto oo aad wax ila qabato".

Mahad isaga oo jaamacaddii jooga ay soo gaadhay warqaddii,wuxuuna yidhi"anigu kuna fahmin waxaad tahayna garan maayo,ma- rkaa waxaan kaa codsangyaa in aadan waraa dambe iisoo dirin".

Aana maalmo yar ka dib waxaa soo gaa- dhay jaawaabtii warqaddeeda,kumase farxin markii ay aqrisatay,waxayna go,aan ku gaa- dhay in ay igland tagto bal in ay wax guul ah ka soo hoyso horfadhiga ay hor fariisa- neyso mahad,waxayna isoo kicitintay igland iyada oo sahaydeedii sidata.

Mahad aabahii horuu u dhintaye wuxuu ka wewelsanaa hooyadii oo siday soomaaliya u aaday aanu war ka helin geerida odayga-na aan ogeyn, fekerkaas faraha badan wuxuu go'r galab ah ku dhaqaajiyey xarunta ciid-amada nabad gelyada si uu uga war doono in ay wax raad ah ka hayaan nimankii aabihii dilay, markuu yimid xarunta waxaa loo shee-gay in ninkii arimahaas u xil saarnaa uu maqan yahay, mahad meeshii ayuu iska farii-stay si uu ninkaas u sugo,, muddo saacad ah markuu sugo ayuu kacaa oo soo eegaa, habee-nkaas badidiisu taagni socod ayuu ku dham-aaday; markuu ninkii iman waayeyna wuxuu u soo luuday jahadii gurigiisa ku beeghaa is-aga oo cadhaysan.

## -KUU HIBEEYEY NAFTAYDA-

Xilligu wuxuu ahaa xagaa sida caadda ahna igland xagaaga waxaa ka dhaca dhaxan aad u xoog badan, cirkana waxaa ku gedfanaa dhedo nafleyda dhex martaa dhibsaneysay ci-ddii aan lahayn huga dhaxanta laga xidho

Aana iyo Nasriin tagsigii ay wateen hore ayey u fasaxeen maxaa yeelay lacag ayaa ku socotay inta uu sugayo inta ay u socdeena mar ahayn mid ku dhamaaneysay saacad iyo laba toona.

Aana cadho ayey la hadli kari weyday waxaana ugu darsantay dhaxan iyo dhedo xoogah,nasriin qudheedu dhibka wey la qabtay midda jacaylka mooyee,waxayna isku dayday in ay saaxiibteed cadhada ka baabi,iso.

Baabuur badani magaalada ma dhex mareyn waxaana waddooyinka isku xidhay dhedo wax araguna aad buu u liitay,Aana cadhada haysay darteed waxay marmar iska geheysay waddada badhatankeeda waxaasa ka qabanayey saaxiibteed nasriin.

Waxay soo luudaanba waxay heleen tagsi isagii bayna kireysteen,markay tagsigii galeen ayaana Aana hadalba ugu horeysay,waxayna tidhi"waxaan ballan ku qaaday in aan waxaan maal haysto ku qarash gareeyo sidaan wiilkaas gadanta ugu dhigi lahaa,lacagtu

maxay noo tareysaa haddaanan waxan doonno ku qabsan karin"

Nasriin ayaa tidhi"saaxiib jacaylka maan arage waa wax ileyn dhibaatadiidu illaa iyo xad gaarsiisan tahay maqal mooyee adigaa iigu horeeya wuxuu hayo jacaylka "

"saaxiin iga daa digashada anigu hadalkaaga waxaan u arkaa digashee mar haddaad waxba ka qaban kari weyday arintii aan kuu sheegay"

Tagsiiluhu wuxuu la yaabay gabadhan wax jecel iyo sidaanay gacanta uga haynin kii ay jeclayd sheekadooda ayuuna dhegta la macaansanayey.

Labada guri waxaa dhowaa guriga nasriin isaga ayaana lagu hor maray,markii nasriin gurigeeda la geeyey waxaa loo dhaqaaqay jihada uu jiray guriga Aana,tagsiilihii oo sheekada hore ula socday ayaa su,aal weydiiyey Aana isaga oo leh,"wiilka aad jeceshahay isagu kuma jecla miyaa"

Aana waxay ku jawaabtay"haa isagu ima jecla eeaniga ayaa jecel ee arintaa xaalkeeda ma taqaan"tagsiilihii ayaa haddana Aana ku yidhi"markaad u sheegtay muxuu ku yidhi" wuxuu igu yidhi Kuma doonayo weliba wiilkaas aan sidaas ugu dhimanayo waa wiil afrikaan ah oo reer iglan ah"tagsiilihii ayaa haddana Aana ku yidhi"markuu isagu afrikaan reer iglan ah yahay adigu yaad u dhalatay?"waxay ku tidhi"anigu waxaan ahay reer holand waxaanan waddankan imid dhowaan laakiin hore ayaan ardayad uga ahaan jiray" "i dhegayso lacag ma haysataa gebigiisaba aanu kuu afdu bnee""lacag waan haystaa ee armaad adigu hawshaas ka soo bixi weydaa?" tagsiilihii ayaa u celiyey"haddaan wax ka qaban waayo! lacagba ha i siin".

Aana hadalkaas tagsiilaha rajo ayuu geliyey,waxayna ku tidhi""waa inoo habeen dambe si aynu uga sheekeysanno arimahan iiguna imow gurigayga"gurigeedii ayuu ku dejiyey iyada oo farqi weni u dhexeeyo markii ay soo fuuleysay iyo imanka. 

Mahad habeenkaas si caadi ah ayuu ǂ isaga seexday xxx Aroornimadii ayuu jaamacadii soo aaday waxayna ku kulmeen N Nasriin,waqtiguna wuxuu ahaa aroor hore oo aan xiisadihii la galin,waxayna Mahad u sheegtay inay saacadaha firaaqada ah - kulmaanxx isna wuu kayeelay isaga oo filaya inay arimihii gabadhii kala hadlayso

Mahad muu lahayn wax saaxiib ah oo ay wada socdaan,wuxuuna u badnaa kali a socod aan cidi danayn;xataa dhibaatada ku timaada xalkeeda cidna uma soo bandhigi jirin,cidii waydiisase wuu uga warami jiray.

Nasriin saacadihii nasashada ayay Mahad ugu timid baar sharaabka laga cabo waxayna ula baxday meel gees ah waxayna waydiisay su'aal ay mudaba doonaysay inay mahad waydiiso,waxayna tidhi:
Nasriin "ma ii sheegi kartaa waadigii habeenkii lahaa reer yurub oo dhan colbaan la ahaye sababta aad ula colowday iyo -

colaada heerkaa gaadhay ee aad kasamti - wayday ee magacooda oo dhan kulmisay?

Mahad su'aashii isaga oo ka jawaabaya wuxuu yidhi: "Ilaahow qof aan wax ogayn ha cadaabin naa miyaadan ogayn dhibaatada ma wada taaban karee in habeen habeenada kamid ah anagoo gurigayagii iska joogna nala soo weeraray aabahayna uu dhaaacaw soo gaadhay isna uu mid kow kaga siiyay isaga oo isdifaacaya oo anaga nadifaacaya dabadeedna odaygii aabahay laqabtay oo xabsiga loo taxaabay laguna xukumay lix sanadood oo xadhig ah,mase ogtahay markuu xadhigiisii u dhamaaday in shaqadiisii loo diiday oo layidhi waxaad tahay dilaa budh cad ah,waxaa taa kadaraydd markaan hudheel furanay si aan noloshayada ugala soo baxno dabadeedna noloshii naloo quudhi waayay aakhirkiina niman budh cad ah inta lacag lasiiyay ay aabahay dileen habeen Axad ah may 12keedii 1958kii oo ah sanadkii aynu soo dhaafnay,geeridu waa xaqe

haba dhintee waxaa ayaan daro ah nimankii dilay oo aan wali lahelin;markaa Nasriiney dhibku mayara xx hakala xoog badnaadee".

Nasriin intii uu sheekada waday aad ± iyo aad ayay u naxsanayd waxayna tidhi: "Mahadow waa gartaa mar haday intaasiba ku soo martay iminkana aad wali joogto meeshay waxaasi kaa soo qabsadeen aad baad iiga dulqaad badan tahay".

Saacadii waxbarashada ayaa lasoo gaadhay waxayna kala aadeen fasaladoodii.

Galabnimadii waxay Ana soo booqatay saaxiibadeed Nasriin iyadoo doonaysa ianay kala tashato arimihii uu taksiiluhu ku soo biiriyay iyo ihay suuro gal tahay,waxay u soo bandhigtay arintii dhexmartay iyada iyo taksiilaha bilow ilaa dhamaadx laakiin Nasriin uma guuxin arintaa iyada ah,waxayna uga sheekeeysay in mahad dhibaato badani soo martay oo ay u gaysteen niman budhcad ahi aakhirkiina ay aabihii dileen kuwii dilayna aan ilaa iminka la-

hayn;sidaa dartèed hadii adna budh cad iyo afduubid ku samayso waxaa suuro gal ah aha uu halis u yahay waali ama isaga oo dagaal-ama dabadeedna la dilo iyo sababo kale oo fara badan markaa saw dhibaato cusub ma aha, haday taasi timaado.?

Aani markii ay muddo dhagaysanaysay hadaladii saaxiibteed waxay tidhi:
"saaxiib waa runtaa oo waa suuro gal xal kalase lama hayo".

Aani way kacday oo saaxiibteed maca salaamaysay,waayo waxaa lsoo gaadhay waqtigii ay balanta ku lahayd gurigeeda;markii ay gurigeedii timid oo ay saacad ku dhawaad joogtay ayaa tagsiilihii albaabka soo garaacay iyada ayaana ka furtay gurigana iyada maahee cidkale majoogin.

Aana iyo tagsiilihii waxaa u bilaabatay sheeko dheer oo ay ku waydiinayso sidùu hawshan u gudan lahaa iyo inuu hawshan oo kale hore u soo qabtay iyo khibradaha uu u leeyahay,wuxuu yidhi:"hawlo ka dhib badan

ayaan hore usoo qabtay oo waliba aan ku guulaystay;"wax ma iiga sheegi kartaa ayay tidhi iyo sidaad uga samato baxday dhibaatada ka danbaysay."

Wuxuu yidhi horta anigu wadankan waxaan joogay muddo afar sano ah markii horena waxaan ka imid Itaaliya oo aan u dhashay waxanina waa shaqadayda aniga iyo rag kale oo saaxiibaday ah markaa wixii hore iska daayoo tii ugu danbaysay waxaan ku gutay wadankan".

Waxay tidhi Aana oo muxuu ahaa falka ugu danbeeyay bal iiga sheekee koley iminka anigi bahdiinaan ku soo biiraye?"

"Oo adiga maxaan kugu aaminaa waxba kaama hayee?"

Aan intay kacday ayay u soo saartay lacag waxoogaa ah oo horu marin ah marjaasay faraha kasaartay oo tidhi "igu aamin lacagtan inta kalena waad heli doontaaye ee bal horta taariikhda waxqabadkaaga ii taataabo"

Tagsiilihii wuxuu yidhi"waxaa jirtay inuu

nin madoobi hudheel lahaa hudheelkaasna waxaa u dhawaa laba hudheel oo ay lahaay- een laba nin oo ingiriis ah,nimankii suuqi ayaa ku xumaaday waxayna ku dadaaleen si ay ninkaa madow hudheelka uga xidhi lahaa- yeen wayse ku guulaysan waayeen markii ay saheeyeen falal badan aakhirkii ayay anig iyo saaxiibaday lacag nasiiyeen si aanu ninkaas u dilo waanuna ku guulaysanay;wux uu ahaa habeen gurigiisa ayaanuna ku dila ilaa iyo iminkana nalama ogaan oo waxaanu nahay tagsiilayaal".

Aana markuu ninkii sheekadii dhameeyay way naxday mara way faraxday maxaa yeelay sheekadani waxay u egtahay sheekadii ay saaxiibadeed uga sheekaysay oo ah tii lag dilay kay waxan oo dhan u samaynayso aabi markaa waxay naxday ninkani xaqdarada uu ku dilay ninkaa shaqaysanayay,mara waxay ku faraxday hadii ninkani uu noqdo kii Ma- had aabihii dilay oo ay u sheegto inuu ma qifkii hore kasoo dabacayo oo uu wax laqa banayo.

Aana iyo tagsiilihii waxay ku kala tageen balan danbe iyo siday guriga Mahad u tusi lahayd waxayna balameen saddex habeen kadib,iyada qorsheheedu wuxuu ahaa marka mahad nimankani qabsadaan inay yidhaahdaan lacag madax furasho ah bixi oo awoodiisa kasaraysa kadibna ay iyadu bixiso maalinta balanta ugu danbaysa dabadeedna ay mahad faraha ku dhigi karto marhaday naftiisa badbaadisay.

Aana galabnimadii danbe sidii caadadeeda ahayd waxay aaday saaxiibadeed Nasriin,markay u tagtayba waxay uga sheekaysay sheekadii dhex martay iyada iyo tagsiilaha iyo tii uu uga sheekeeyay ee wax qabadkiisa kamidka ahayd.

Nasriin aad iyo aad ayay u faraxday waxayna saaxiibteed u sheegtay mar hadaad ninkaa fara ku hayso mahadna farahaaguu ku jiraa waayo ninkan aad sheegayso waa ninkii mahad aabihii dilay,Nasriin waxay saaxiibteed ku tidhi ina keen hadaan mahad utagaynaaye.

Way isa soo raaceen intay tagsi soo kaxaysteen waxayna yimaadeen gurigiisii iyaga oo aad yaabto qosolka kadhacaya sababtoo ah maanta waxay sidaan guul aad u wayn.

waxay usoo galeen mahad oo wax akhrinaaya markaasaa lagu salaamay"Bushaaro' markaasuu yidhi"Bilkhayr;ma hooyaday baa timid?!"Nasriin baa tidhi"imaan shaha hooyo mid ka wanaagsan ayaan kuu haynaa ee maxaad ugu jeclaan lahayd wax maanta laguu sheego"?!

"Waxaan ugu jeclaan lahaa Hooyaday oo aan warkeeda helo".

"Maxaad ugu abaal gudi lahayd qofkii maanta kuu sheega ninkii aabahaa dilay"?.

Mahad intay farxadii kabatay oo uu cabaar aamusnaa xusuusina latagtay uu xasuusanayo habeenkii aabihii ladilay ayuu yidhi "kaas abaalkiisa ilaah baa gudi kara ee anigu magudi karo".

Nasriin ayaa hadana tidhi "wuxuu kaa codsado oo aad adigu u qaban karto ma u qabanaysaa"? "Waxaan u qaban karo ayuu ka-

Hadaba nimanka aabahaa dilay mid kamid ah
Aana ayaa gacanta ku haysa"Mahad ayaa Ana
ku yidhi madhabaa?" markaasay tidhi haa
waa dhab" aniga ayuu farahayga ku jiraa"

"Bal iiga sheekee inuu isagii yahay
iyo inkale"

Aana sheekadii ayay bilowday ilaa ay ka-
dhamaysay waxayna u sheegtay waxaas oo d
dhan inuu isagu ku kalifay oo ay usamay-
naysay isaga dartii inay disho oo qudha,
markay sheekadii ninka dhamaysay ayay u
sheegtay inay labalansan tahay laba habe-
en kadib uuna gurigeeda imaanayo.

Mahad markuu xaqiiqsaday inuu ninka-
asi nimankii kamid yahay ayay ilmo dhibi-
cda roobka le'egi kasoo booday markaasuu
intuu is hayn kari waayay Aana ku soo bo-
oday oo qoorta isaga duuduubay sida maska
isggoo dhunkasho ku waalaya ilmaduna kad
a'ayso waxaase isaga ka darnayd Aana oo
waa cudubi u baryay heerkulka jidhkeeduna
wuxuu gaadhay heer aan la qiyaasi karin,

Dhererka waa lays le'ekaaye gacmo dhumu leh ayay dhecda kabuuxsatay waxaanad mo daysay shaqsi kali ah.

Aana ilmada ka qubanaysay qiyaas ma lahayn Mahad shaadhkiisuna wuxuu noqday sidii wax lamaydhay.

Hadaba Akhristoow habeenkaasi wuxuu ahaa habeen Axada wuxuu ahaa habeen daah ufurmay intii dulmanayd, wuxuu ahaa habeen kii kalsoonidu beerantay, wuxuu ahaa habeen farxad iyo fakar la'aan lagu gam'ay.

Nasriin qadar labaatan daqiiqo ahayd oo laysku dul ooyaayay waxay daawanaysay filimkan cusub ee ay jilayaan.

Mahad waxaa ilmada kakeenay farxadda loo sheegay, Aana waxaa kakeenay kay u oomanayd oo habeenkii u horeeyay jidhkiisa ama dhabankiisa dhunkato isagoo karaali ah, fadhigii ayaa lagu kala nastay iyadoo laysi dheehanaya sidii diin iyo a dhashii farxadda wajigooda kamuuqatana e aan cidi qiyaasi karin Aani hasii daraatee

Mahad intuu kacay ayuu dukaan u dhawaa cunto fudud ka doonay isagoo dib u xasuus-anaya habeenkii hore ee ay Aana iyo Nasriin u yimaadeen cadhaday gurigiisa kaga tageen iyo caawa farxadda wajigooda kamuuqata oo aan ahayn wax lays bar bar dhigo.

Iyaga qudhoodu habeenkaas soo qaade waxayna yidhaahdeen "habeenadu kala wanaagsan ma wax la isbarbar dhigaa caawa iyo habeenkii hore.

Mahad wuu soo noqday waxaana si farxad leh loo cunay cunnadii uu keenay markii la dhamaystay waxaa lagu balamay sidii mii kii loo qaban lahaa dhunkasho iyo farxad ayuu mahad ku sii dhaweeyay labadii gabdhood waxayna aadeen guryahoodii iyaga oo guul kanbaarsan.

Mahad aroortaas muu aadin jaamacaddii ee wuxuu aaday xaruntii ciidamada nabad galyada si uu ula socodsiiyo arimaha soo kordhay iyo sidii loo qaban lahaa ninkaas Habeenkii balanta ayaa lasoo gaadhay

Aana iyadu waxay fadhiday gurigeedii oo ay ku sugaysay ~~xx~~ tagsiilihii budh cadda ahaa Nasriina waxay guriga Aana u soo kaxaysay ciidamadii iyo mahad oo wada socda.

Aana iyo tagsiilihii oo gurigii wada ~~f~~ fadhiya ayaa waxaa soo garaacay gurigii ciidamadii waxaana ka furay Aana markii ay ~~d~~ gudaha soo galeen ayuu ninkii arkay ciidamada guriga soo galay wuxuuna isku dayay inuu baxsado oo daaqada ka boodo, laakiin way u suuro gali wayday gacanta ayaana lagu dhigay. Waxaa lakeenay saldhigii ugu dhawaa, markii saldhigii lakeenayna waxaa danbigii ~~s~~ siduu ugu sheegay ugu cadaysay Aana; waxay kaloo ciidamadii ku tidhi aniga qudhayda wuxuu iga qabaa lacag intaas le'eg ee halaiiga qaado ninkan budh cadda ah.
Maalmo kadibna waxaa la~~s~~oo lasoo qabtay nimankii danbiga la galay.

Dhawr bari kadibna waxaa lasoo taagay maxkabadda waxaana ku maxqaati furtay Aana dabadeed waxaa lagu xukumay xabsi daa ima,

aadama ay budh cadnimo ku sidoobeen.

Mahad maalintaa wuxuu casuumad u diy-ariyay Aana iyo Nasriin, wuxuuna casuum-dda ku diyaariyay gurigiisa, goobtaa iy-da ah ee uu casuumadda ku diyaariyay ama qiyaasi karay habka uu u diyaariyay yo sida uu guriga u sharxay qadar yar adib waxaa soo galay labadoodii oo xag-si wata, si wanaagsan ayuu u soo dhaweey-ay waxaana lafadhiisiyay mijiliskii loo-gi talo galay, intii cuntada lacunayay waxaa socotay kaftan iyo sheeko googoos ah, Mahad ayaana ku yidhi "Aana abaalkaa-ga ma gudi karo ee ilaah baa gudi kara ee maxaan kuu qabtaa"? Aana iyada oo faraxsan ayay tidhi "Mahadow wax kale ka-adoonimaayee waxaa kaliyoon ku nafisi lahaa neecaw qaboobina imati lahayd ani-goo adiga ku hela", mahad ayaa u celiyay "Naftayda kaala bakahayli maayee hadaad iyada ku qaboobaysid kuu hibeeyay naftayda".

Aana oo damiirkeedu isaga ku doorsoon yahay ayaa tidhi"mar hadaad naftaada ii hibaysay waxaan u ordayayba adigay ahaayeen,markaa wax kale oo iga maqan garan maayo,aan adiga ka ahayn.

Sidaas ayäyna ku kala höydeen,Nasriina habeenkaas Mahad wuxuu siiyay lacag abaal marin ah maadaama ay si hagar la' aan ah ula shaqaysay.

## AROOSKII SAXARIIRTA

^^^^^^^^^^^^^^^^^^^^^^^

Goor barqo gaaban ah oo cirka aad mooddo in uu xalay da,ay oo kale ayna ku gedfan yihiin daruuro kala googoan,jahada bari waxaa ka muuqatay qoraxda oo aad moodaysay dayax,maxaa yeelay falaadhihu waxba ma diiriyaan.

Neecawda subaxdaas dhacaysay qof kasta wuu dareemayey,maxaa yeelay shimbiraha iyo xayawaanka kale ayaad ka dareemaysay in ay gaadhay xiliyadii roobabkay da,

i jireen.

Mahad waqtiga sidaasa ayuu ka soo toosay hurdo uu ka soo go,ay,wuxuu isu diyaarinayey jaamacaddii oo uu ku jiray simistaradii ugu dambeeyey.

Markii uu gurigii soo xidhay oo illinkii dibadda uu taagan yahay ayaa waxaa la soo hor dhigay tagsi ay wadatay Aana oo dooneysay in ay jaamacadda geyso sababtoo ah waxay dooneysay,waayo waxay ka baxday kelinimadii iyo walwalkii joogtada ahaa.

Markuu mahad soo galay tagsigii iyadu waxay fahdiday kursiga hore isaguna kan dambe,intay soo kacday ayey kii dambe la soo fariisatay oo kii hore soo bannaysay.

Waxay dhaahaneysay dhererka,dhucda,midabka mas ciideedka ah ee mahad,waxay tidhi "mahadow raggiinu ma adoo kalaa mise adigu waxaad tahay iska dhal laba jinsiyadood oo kala duwan"wuxuu yidhi"Anoy anigu waxaan ahay soomaali saafi ah,soomaalidana anaa ugu fool xun markaad sii eegto,waxaa wana

agsanaan lahayd adoo mar soo eega soomaal-iya".

Waxay tidhi"waa qasabb in aan mar soo eego mar haddaan naf wadaag nahay,neeftee-nunu isku baxayso".

Waxaa la soo gaadhay jaamacaddii waq-tiguna muu ahayn mid ay dareemayeen sabab-too ah waxay ku jireen koorsooyin cusub oo kalkacal wadaag ah waa i noo caawa ayaa la-gu ballamay inta dhunkasho la is dhaafsad-ay ,goobta ballantuna waa guriga mahad.

DHibaatadii iyo walwalkii faraha bad-naa mahad badh baa ka hadhay waxaa keliya oo uu tabayey hooyadii iyo waxa ay ku sug-n.tahay inuu ogaado.

Nasriin oo ah gabadh reer afrika ah una dhalatay masar qayb libaaxna ka qaada-tay ususoo dhawaanshaha mahad iyo Aana aya mahad u timid waqtigii laga nasanayey wax-barashada waxayna la yeelatay sheeko waxay tidhi"mahadow waxay ila tahay Ana is faha-mte midse ogow isku day sidaad gabadhaas

inta xaqa ah ee aynu ku dhalanay uga dha-
hicin lahayd.

Mahad wuxuu yidhi"waan ogahay in ay
shaakil tahay laba qof oo kal diina wadae
codkooda waxaase ku dadaalayaa sidaan u
nuunin lahaa,waxaase nasiib wanaag ah la-
qof ee ay dadka kala socotaba waa laba-
ena inana waxaanu nahay muslin markaa ad-
kaalintaada ka soo bax anna teyda igu
a".

Waayahay iyo waayahay ayaa lagu kala
gay iyagoo go,aan ku gaadhay inuu midba
an ka hanuuniyo.

Habeenimadii ayey Aana mahad gurigii-
ugu timid,dood dheer ayaana jhalkaas ka
laabatay,Aana ayaa tidhi"mahadow waxay
a tahay waa cusub ayaa inoo beryaayey,wa-
ana wanaagsan inaan danaheena mustaqbal-
ka sheekeysanno".

"waa wax inagu waajib ah haddeynu me-
a badan isku aragti ka noqonno waqtigan
adirka ahna waxaan qabaa inkastoo kalso-

onideenu kobocday in weli buur qaaf ina kala dhex taallo".

Aana ayaa tidhi"oo maxay tahay waxa ina kala dhex yaalla",intay naxday oo is tidhi miyuu is baddalay markuu kugu daneystay.mahad ayaa yidhi"ha nixin wax kale maha e waa xagga diinta,diintana waa nolosha badhkeed sidaad darteed anigu waxaan ahay nin muslin ah oo muslinnimo ku dhashay, markaa haddaad dooneyso inaad aaqiro iyo aduunkaba liibaanto soo gal diinta xaqa ah".

Aana waxay ugu jawaabtay"oo haddaan diintaada soo geli waayo arintu ma aan kala tagnaa".

Mahad"anigu ku odhan maayo sodaas wayo abaalkaad ii gashay ayaanan marna gudi karin laakiin waxaan ku leeyahay maxaa kusoo gaadhaya haddaad diinta soo gasho iyadeynaan waxba ku waayeyne".

Aana waxay tidhi"mar haddey diintu ina kala fogeyneyso taada ayaan kugu raacayaa"

Mahad markey sidaad tidhi ayuu ku bilaabay-
aa wacdi oo ashahaada u qabanayaa una shee-
gayaa waxyaabaha diintu ka xaaraantinimeyn-
eyso iyo waxayaabaha u xalaasha ah,wxa uura
awoodiisa oo dhan isugu geeyyey sidii uu Aan
diinta u bari lahaa;talaabadii ugu horeysay
ee uu qaadayna waxay ahayd tii uu wac kaga
badalayey jirkeeda waxayna ahayd gudniinka
oo uu ka dhaahdiciyey in qodka muslinka ah
waajib ku tahay inuu gudan yahay.

Maalin maalmaha ka mid ah ayey Aana u
timid saaxiibteed nasriin waxayna u sheegt-
ay waxyaabihii ay mahad kala kulantay iyo
in ay dinnta muslinka qaadatay,waxayna ka
wareysatay arimaha gudniinka.

Nasriin waxay u sheegatay in ay aad x
ugu faraxsan tahay ku soo biiridda ay ku soo
biirtay diinta islaamka,mahadna uu yahay
nid la guusoo diray mugdina kaa saaray.

Nasriin waxay tidhi "gudniinku wax dhi-
aatm ah maaha aniga ayaana ku gudaya".

Aana"oo adigu ma waxa aad tahay taqtar

sidaad ii gudeysaa".

Nasriin"sowniga iminka ka qalin jabinay kulliyadda caafimaadka,midda kale gudniinku maaha wax sidaad u soo weyn qofka xx waxgudayana waa qasab in uu muslim yahay".

Ugu dambeyntii gabadhii Aanahayd halkaas ayaa lagu xalaaleeyey oo ay ku noqotay quf muslinnimada u daacad ah,diintana waxaa bari jiray oo daacadnimo uga dhaahdicin jiray mahad iyo nasriin si ay ajar uga helaan xagga ilaahay.

Aâna markiiay diintii ku duxday muddo sedex bimoodna wacdi iyo waano lagu waday ayuu maalinkii dambe mahad u yeedhay shiiq si uu igu mehriyo labadooda,sidaad ayeyna dinta muslinka isugu mehersadeen.

Waxaa wax lala yqabo hayd Aana markii ay diintii fahamtay oo ay ka dhaadhad ay in ay xitaa iyadu magacii iska beddashay oo ay la baxday xaliima oo ay ka maqashay reero soomaali ah oo ay mahad guryaha wada deganaayeen.

Waxayna Mahad iyo Nasrii u sheegtay in maanta laga bilaabo loogu yeedho Xaliimo ee aan loogu yeedhin Aana.
Mahad iyo nasriinba aad iyo aad ayay ugu farxeen guusha weyn ee ay gaadhay.

Xaliimo sidii ay uga timid kuma ay noqon wadankeedii iyo xoolihii aabaheed uga dhintay oo aanay war kahayn, Sidaa darteed Mahad waxay u soo bandhigtay inuu u raaco Holand si ay ugu soo aqal galaan isna wuu kayeelay laakiin wuxuu yidhi "ii dulqaado tobanka casho ee jaamacca iiga hadhay.

. Mahad jaamacaddii wuu ka qalin jabiyay waxayna isga iyo xaliimo isu raaceen Holand si ay ugu aqal galaan Nasriina kama ay tagine way soo kaxaysteen si ay arrooskooda goob joog uga noqoto.

Xaliimo intii ay Iglan ku soo maqnayd ayaa rag badani xoolaheedii lakala tageen iyaga oo geeri ku tirinaya, sababtoo ah si fudud ayay markii hore ku baxday iyada oo

aan cidna waxba u sheegin, laakiin markay t- tagtay waxay bilowday dacwad ay ku soo oog- tay rag badan, aakhirkiina xoolaheedii bada- bkoodii way soo dhacsatay.

Muddo kadib waxay bilowday qorshihii ar- ooska iyo qaban qaabadiisii, Xaliimo waxay arooskeeda gdm ugu talo gashay inuu naqdo mid dadka reer Holand xasuus ku reeba, qal- bigoodana aan ka go'in waligood.

Waxay diyaariday kooxaha wadanka ugu wa- naagsan waxay kaloo diyaarisay saxiimado la gu dabaal gxk dago sababtoo ay aroosku wux- uu ka dhacayay markab badda dusheeda yaal oo ay kiraysatay, aroosku wuxuu bilowday ma- alin Axada wuxuuna dhamaaday axadeeda.

Waraaqaha lasiiyay dadaka kasoo qaybga- layay xafladda waxay u qoraayeen sidan:

AROOSKII SAXIIMADAHA

Waxaa lagugu casuumay inaad kasoo qayb gasho arooska kadhicidoona badda dushe- eda ee arooska iyo aroosadda Xaliimo & Mahad, una dulqaata mudad uu soconayo oo

ah toban maalmood.

Mahadsanidiin.

## FARXADI WAA NAXDIN

Arooskii u dhacay Mahad iyo Xaliimo e sidii ku tala galkoodu ahaa ayuu u dhacay, wuxuuna ahaa mid daka reer Holand maskaxdooda ka go'i waayay ay kuna sheekaystaan dad badana ay ku daydeen koodii oo kalna dhigteen.

Mahad iyo Xaliimo waxay noqdeen laba qof oo wax lagu qiyaasaa aanay jirin, Mahad wuxuu kasoo wareegay Iglan wuxuuna u soo wareegay Holand,wuxuuna shaqo kahelay warshad dharka samaysa waayo wuxuu ahaa kimistari yaqaan rinjiga dharka ayuuna diyaarin jiray.

Nasriin oo ahayd midii qaybta weyn kaqaadatay nolosha weyn ee qoyska Mahad iyo Xaliimo waxay ku noqotay Igland waxayna halkaas kasii wadatay waxbarashadeedii.

Xaliimo muddo kadib waxay yeelatay U Uur, aakhirkiina waxaa isku soo beegmay xuskii maalintii aqalkooda lataagay iyo dhalashasii ilmihii ugu hoteeyay oo loogu wal qalay Maxamed;maalintaasina waxay ahayd maalin axad ah.

Mahad wuxuu sameeyay xaflad la isku arkay maadaama ay xaliimo umul tagay sababtoo ah go'aankooda ayaa ahaa inay xaflad sameeyaan sanad kasta maalintii aqalgalkoodu ahaa oo ku beegnayd 10kii Janaayo 1962kii.

Mahad wuxuu habeen habeenada ka mid ah soo qaatay buugiisii xusuus qorka ee aabihii waxaana ku qoraa jiifto dardaaran ah oo uu abtigii kula soo dardaarmay bariguu soo aaday Igland ee uu reerkooda soo rarayay jiiftaduna waxay u qorayd sidan:

Abtiyow i dhagayso
Arligaad u kacayso
dad ishaamba maaha
Oo diinta way inkiroene
Yaan lagaa afbadnaanoo

Toobadii ha ilaawin
Ee ihidaana ogow.

Abtiyow i dhagayso
Arligaad u kacayso
dhaqankoodu waa u gaare
Isirkaynu lahayn iyo
Midkeenii ha ilaawin
Dhalanteed ha arkoone
Odhaahdayda ogow

Abtiyow i dhagayso
Ciidu waa wax uggoone
Midduu eebe nasiiyay
EEn laguugu absheegay
Iilku meeshuu ahaa
Isagaa asalkii ahe
Arligaaga ogow.

Mahad markuu dhameeyay akhriskii dardaarankii aabihii lagula soo dardaarmay waxaa qaaday qiiro wadani nimo wuxuuna ka war helay inuu dalkiisii xornimadii qaatay.

Go'aankaas uu gaadhay wuxuu u soo bandhigay Xaliimo oo ahayd oori ƙalo wanaagsan,wixii suuro ƙal ahna aan marna ku diidin.

Xaliimo markii uu Mahad u soo bandhigay go'aankii uu gaadhay kuma diidin,laakiin waxay waydiisay su'aal ah,malaga yaabaa "Mahadoow inaad soo noqon waydo oo aad halkaa nagu ilowdo"?

Mahad wuxuu yidhi "Maya",ee waxaa wal wal igu haya hooyaday oo iyadoo uur leh s soomaaliya aaday,wax war iyo wacaal ahna aanan ka hayn. Warna uma hayo dahay nooshahay inay maqashay geeridii aabahay ".

Cambaro(Mahad hooyadiis) markii ay tagtay soomaaliya oo ay joogtay muddo laba bilodd ah ayay Umudhay,waxayna dhashay wiil ay u bixisay Axmed,waxaase layaab ahayd in geeridii Cawaale ay u sheegeen niman da bad mareeno ahaa oo ay kula kulantay magaalada Berbera. Nimankaasi waxay Canbaro u sheegeen in Cawaale iyo wiilkiisii Curadka la dilay.Dib ayay u soo carartay

iyadoo naxsan, adduunyana ku madoobaatay, maadaama ay odaygii iyo wiilkii iska raaceen.

Markii ay soo noqotay ee ay u timid reerihii waxay u sheegatay warkii dhiilada ahaa ee ay soo maqashay, waxaana durba isu tabiyay reerihii beesha oo dhan oo ay kamid ahaayeen adeeradii iyo abtiyadii wiilkeedii Mahad. Dadkii waxay badankoodii kanaxeen Cawaale oo ay yaqaaneen; laakiin wiilka uu dhalay ee Mahad lama aqoon sidaasna loogama nixin.

Canbaro markay hubsatay in odaygeedii dhintay, sida caadadu ahayd waxaa dumaalay dumaashigeeda lahaa dumaasheeda ee Geelle oo ay cawaale hooyadii dhashay, isaga qudhiisuna inan dumaaleed ahaa. Hadaan sii fududayno Geele waa wiil ay Cawaale isku bah ahaayeen oo ay hooyadii dhashay, waxaana dumaalay Cawaale adeerkii. Hadaba barigii uu Cawaale bad mareenka ahaa; waliba markii uu lasocday markabkii Ingiriisku lahaa Muddo

saddex bilood ah oo uu maqnaa oo ah hary-ihii uu Cawaale mehersaday Canbaro ayuu geele uurka hooyadii ku jiray; dabadeedna waa kii Cawaale reerkiisa laguuray markaa Geele wuxuu Mahad kaweynyahay sideed bil-ood waana isu adeer.

Canbaro marna isma oran wiilkaagii M Mahad ayaa Nool, waxayna iska degtay oo g guri kadhisatay magaalo madaxda muqdisho Geelana wuxuu u shaqayn jiray wasaaradda hawlaha guud oo uu darawal ka ahaan jiray

Mahad wuxuu uruursaday alaabtiisii si uu u soo aado soomaaliya, wuxuuna soo qaa-tay fasax labo bilood ah. Maalin sabti ah ayuu Holand kasoo duulay, wuxuuna xamar yi-mid maalin nimadii axada.

Wuxuu ku soo dagay huteel shabeelle, af soomaali ayuu ku dx hadlayay laakiin wuxuu ahaa mid uu jajabinayo. Mahad dadka soomaaliyeed ee huteelka seexanayay ayuu waraysi iyo sheekooyin ku bilaabay waray sigiina wuxuu u badnaa baadi doonka reer-

koodii,wax u sheegase muu arag laba iyo maalimood oo uu joogay.

Ayaan danbe ayuu Mahad tagay xeebta si uu ugu soo cadceedsado;goor subax ah. Nasiib wahaag waxay kulmeen nin layiraahdo Cabdi baxaar oo ay aabihii Cawaale isku markab ka shayqayn jireen,middona reer Iglan ahaa. h Ninkii ma aanu garan iminka kaakiin mahad baa gartay.

Mahad intuu odaygii usoo dhawaaday oo salaamay ayuu yidhi "Saw matihid Cabdi baxaar"? Odaygii oo yaaban baa ku jawaabay " waan ahay" "Aniga ma igaranaysaa"?ayuu Mahad misna u celiyay,kugaran maayoo isu kay sheeg".

Mahad wuxuu xxwxxkx Odaygii u sheegay inuu Cawaale wiilkiisii yahay oo ay Iglan wada daganaayeen.

"Adiga iyo aabahaaba waxaan idinku tirinaynay geeri ee manoolayd"? ayuu odaygii oo fajacsan yidhi"?

"War waan noolahaye hooyaday iyo reerk-

ayagii magaranaysaa meel ay ku noolyihiin? "Waan aqaanaa oo hooyadaa oo geeri kugu tirinaysa ayaa magaaladan dagane ina keena aan haatanba kuu geeyee".

Tagsigii soo qaaday ayay guriga hortiisa ugaga dageen, waxaa kasoo hor cararay laba carruur ah oo gaariga daawanayay oo kala weynaa. mid wuxuu ahaa sideed jir; midna afar jir. Cabdi baxaar ayaa u sheegay oo yidhi "caruurtani waa walaalahaa mid waxaa dhalay adeerkaa midna waxaa dhalay aabahaa oo kani waa kii uurka ku jiray barigii hooyadaa Iglan ka imanaysay inta midkii waynaa u tilmaamay.

Isaga oon hadalkii u dhamayn ayaa waxaa albaabkii furtay Canbaro caruurta baabuurta kasoo qabo; waxay indhaha ku dhufatay muuqaal ay aad ugu dhaygagtay, way u qaadan wayday inuu yahay wiilkeedii curad ee Mahad waxa horteeda jooga, waxaa kasoo daadatay ilmo aad moodo sida dhibicda roobka. Ileen farxadi waa naxdine halkii bay ku suuxi gaadhay - 82-

Mahad qudhiisu isagoo aad ugu faraxsan lakulanka hooyadii qaadana la' isbadalka weyn ee uga muuqda mudadii ay laka maqnaayeen ayaa sida gantaalkii ugu soo cararay oo islaantii oo dhicid sigad ugu ah la booday oo dhunkasho ku waalay. Waxaase ka daraayd inta qooyska ah ee hareeraha haysatay ee aanu dareemayn. Dad aad u fara bbadan ayaa isugu soo baxay kuwaas oo kal ahaa dadkii dariska ahaa sheekada reerkana xog ogaalka u ahaa.

Cabdi baxaar oo arintaa aawadeed madaxa lulaaya ayaa yidhi " FARXADI WA NAXDIN".

Buuqii iyo qayladii markay dami wayday Canbaro, Cabdi baxaar iyo Mahad gurigay isku soo xireen. Saddexdoodiiba waxay soo fadhiisteen qolkii fadhiga ee reerka, Canbaro oo markan sidii hore ka gedan baa tidhi "

"hooyo aabe ma dhintay mise wuu noolyahay?"

Mahad ilmaa soo dhaaftay, sijaag daran buuu yidhi "Allaha u naxariisto".

Markaas kadib wuxuu u bilaabay noloshii

mudadii ay soo kala maqnaayeen, sidii aabi-
hii loo dilay iyo qoyska cusub ee uu taagay
wuxuu kaloo u sheegay inuu xaaskiisa mus-
limiyay oo ay tahay muslim khaas ah ayna
qayb libaax ka qaadatay helidda nimankii
aabihii dilay iyo meesha uu gada dagan ya-
hay iminka. Wartiga ay kulmayeen wuxuu ah-
aa gooq barqo ah waxayna isku gaadheen ko-
wdii duhurnimo iyaga oo halkii fadhiya ay-
aa waxaa shaqadii kasoo rawaxay Geelle oo
ahaa adeerkii hooyadiina qaba markuu alba-
abkii soo garaacay waxaa loogu bishaareey-
ay imaatinka Mahad oo aanu Waligii arag,
waxaana u sheegay wiilkii ay mahad isku
bahda ahaayeen ee uu adeerka u ahaa laak-
iin waxaa ka horyimid Mahad oo doonayay
inuu Cali baxaar sii dhaweeyo, markuu waji-
ga ku dhuftayba wuu gartay waayo isaga ay-
uu u ekaa halkii ayaa muddo laysku dhag a
dhagay oo muddo laysku maqnaa markii sala-
antii iyo farxadii dhameyteen waxay tagsi
saareen Cabdi baxaar waxayna ku balameen

barito iyo guriga,Mahad waxaa loo baneey-ay qol kamid ah gurigii huteelkiina wuu ka soo guuray.

Maalintii labaad waxaa lasameeyay xaflad soo dhaweyn ah oo Mahad lagu soo dhaweynayo,Cali baxaara waqtigii balanta ayuu yimid oo ka qaybgalay xafladii.

Mahad waqtigu uma saamixin inuu miyi iyo reerihii kale soo barto maxaa yeelay waqtigu wuu ku gaabnaa marka loo eego ma-rxaladda uu ku suganyahay.

Canbaro iyo Geele waxay Mahad kula da-rdaarmeen inuu soo guuro oo uu reerkii s doomaaliya u soo raro,hase yeeshee Mahad wuu diiday waayo kharash bara badan oo uu reerkooda ku dhisi karo ayuu Holand ku q qabay. Marlabaad waxay iyagoo wada jira kula taliyeen inuu guursado oo uu reer kale soomaaliya ku lahaado si aanu uga g googoosan soomaaliya.

Arinta ay go'aamiyeen waa loo soo ban-dhigay hase yeeshee wuu diiday iyada qud-

heeda;markii uu diiday hooyadii way kµ dul ooyday waxayna tidhi hadaad diiday reer aan kaahga dhawaado inaad dhisto kaa hadhi maayo ee ogow".

Mahad markuu arkay in islaanta arintii meel xun kamarayso wuxuu yeelay guurkii waxaana loo meheriyay ina abtidii maalin kadibna waa loo dhisay. Gabadhu waxay ahayd ina abtidii waxaana dhashay eedadii,maalin axad ah ayuu aqalkiisii labaad iyo arooskiisii labaad arligiisa kataagay.

Mahad waxaa lasoo gaadhay gabagabadii fasaxiisa wuxuuna reerkoodii siiyay cinwaankiisii,wuxuuse kala dardaarmay inaan lasoo hadalqaadin qoyskiisa waayo waxaa laga yaabaa inay waraaqaha ku ogaato dabadeedna aan isku xumaano manaha aha gabadh aan xumaanteeda jecelahay,wuxuu kaloo sheegay inuu sanad walba imaandoono sidaas ayuu mahad ugu duulay Holand.

Hadaha falakii ugu waaweynaa ee noloshii Mahad iyo reer Cawaale waxay dhacayeen maalin

axada, bal aynu xusno siday u kala dhaceen sideedaas axadood iyagoo tix ahaan ah:
^^^^^^^^^^^^^^^^^^^^^^^^^^^^^^^^^^^^^^^^^^^^^^^^^

1. Midi waa Axadii labaduu ka abuurmay aqalkooda lataagay.
2. Midna waa axadii isagu uu dhashayee ifka eebbe uu keenay.
3. Midna waa axadii xabsigii amakaaga aabihii lagu tuuray.
4. Midna waa axadii odaygu uu dhintayee budh caddu oofaha goeysay.
5. Midna waa axadii Aana ay kulmayeen ee aqalkooda lataagay.
6. Midna waa axadii ubadkii u horeeyay aabe uu yidhiyee agtiisa uu ku cayaaray.
7. Midna waa axadii halkuu iilku ahaa iyo arligiisa uu aaday.
8. Midna waa axadii ooridiisa labaad iyo arooskiisa labaad arligiisa kataagay.

Sideedaas axadood ayay ahaayeen sideeda axadood ee ugu muujisada badnaa.!!.;;:

## AFEEF

Soo bandhigidda qoraal qiimihiisu aad u sareeyo oo cid walba jecleysato waa hibo eebe, waxaana qayb ka qaata aqoonta qofka ee cilmi nafsiga, waaya aragnimada uu u leeyahay koonka uu ku nool yahay. murti soomaaliyeed baa tidhaahda nin aan dhul marini dhaayo malaha.

Markaa anigu buuggan waxaan ku cabiray aragtidaydii, haddaba waxaan u maleynayaa in aad aqristow aad is weydiineyso su,aash ah wuxuu qoraagu usoo bandhigi waayey ins ogaanshaha labada gabdhood ee kala jinsiyadda ah ee ninku wada qabo, markey iska warhelaan wixii dhici lahaa, laakiin ururinya buugga intaas ayaa iga soo gaadhay, anigaana idinka jeclaa in aan helo kulankooda.

QORE:

faarax maxamuud sugulle
"faarax daqarre"

P.O.BOX2834
muqdisho
soomaaliya

XUQUUQDA BUUGGAN WAXAY U DHOWRSAN TAHAY QORAHA BUUGGAN.

WAXAA LAGU DAABACAY MUQDISHO
OKTOOBAR 1988.

FAARAX MAXAMUUD SUGULLE
"daqarre"

WARGELIN:

FADLAN WIXII DHALIIL DHINACA FARSAMADA BUUGGA AH QORISTOW U DULQAADO, HADDIISE AY JIRAAN DHALIILO LA XIDHIIDHA DHANKA FARSAMADA QORAALKA WAAN KAAGA MAHAD HAYN LAHAA HADDII AAD ILA SOO SOCODSIISO

QORAHA BUUGGA
P.O/BOX 2834 MU.SOOMAALIYA/

*****FILASHO WACAN*****

Wuxuu qoraaga buugan hore u ebyey buuggii halku dheggiisu ahaa JACAYLKII HANA QAADAY MA HANTAA LAGA DOORTAY iyo buuggan halku dheggiisu yahay SEDDEED-DII AXADOOD;

Waxaa aqristayaasha xiiseeya aqrista sheekooyinka lagu wargelinayaa in ay dhowaan soo bixi doonaan buugaagtan hoos ku qoran:

| | |
|---|---|
| TUSAALLE ADDUUN | xuseen SH;biixi |
| NABSI MAAL MA DAWEEYO | M.F.C 3DU RGAL |
| GACANTII MURUGOOTAY | F.M.SUGULLE"DAQARE" |